



JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingà Talagali Latallatka Dadwiinaga

Weybaa ha Diyaariyeey:

Guddigà Mathabinnaw ee Dastuurka ii Arrimoo Federaalka

30 Luuliyo 2010

-Tusmathà -

GOGOLDHIG	10
UTUBKI 1AAD –BAAQA JAMHUURIYADDA.....	11
QOTHOBKY 1 AAD-MABAADI’DA ASAASIGA	11
QOTHOBKY 2AAD-DAWLADDA II DIINTY	11
QOTHOBKY 3AAD- DASTUURKA	11
QOTHOBKY 4AAD-GOBNIMATHA JUMHUURIYADDA	12
QOTHOBKY 5AAD-ÁFKA RASMIGY EH	12
QOTHOBKY 6AAD-ASTAANTA QARANKI	12
QOTHOBKY 7AAD-DHULKA DAWLADDA.....	12
QOTHOBKY 8AAD-MAGAALAMATHIITHA QARANKA	13
UTUBKY 2-AAD – JINSIYIDDY	13
QOTHOBKY 9AAD-HUQUUQTHY GOONIGY IN EH MUWAADHINIINGTY	13
QOTHOBKY 10AAD-HELOOWKY II HAAYSATHOOWKY JINSIYADDY	13
QOTHOBKY 11AAD-ANG-DHLASHATHA JINSIYIDDY	14
QOTHOBKY 12AAD-MUWAADHING-NIMAATHI LIKI HELI SOOMAALIYEENG	14
QOTHOBKY 13AAD-KALI NAGASHITHY SOOMAALIYEENGTA	14
QOTHOBKY 14AAD-SHARCI ING DIJNINTY MUWAADHINNIMATHA	15
UTUBKY 3-AAD-HUQUUQTHI AASAASKE EH	16
QODOBKI 15AAD-DHAGANG GILINTY HUQUUQTHY AASASIGY EH	16
QODOBKY 16AAD-KARAAMADY INSAANKY	16
QODOBKY 17AAD-SINAANTEH.....	16
QODOBKA 18 AAD-XAQA NOLOLEH.....	16
QODOBKA 19 AAD-ADOONSY, MIDIIDING II HAWAANG ANGKE SHAQAYSIDOW	16
QODOBKA 20 AAD-HURIYADA II NABADGELINTEH QOFNIMAATHA.....	17
QODOBKY 21 AAD-HURIYIDDI ABUROWKA II KY-MID-NAGATHOWKA URUROOGA.....	17
QODOBKY 22 AAD-HURRIYADDI DIINTA II CAQIIDIDY	17
QODOBKY 23 AAD-HURNIMAADA RA’YIGA	17
QOTHOBKY 24 AAD-HURMADA RUUNKY II KHUSUUSIYAADKEH	18
QODOBKY 25AAD-XURRIYAATHÀ KULUNGKÀ, BINAANGBAKÀ ASHTAKATHÀ II WEYDIIMÀ- WATHAREEDKÀ	18
QODOBKY 26 AAD-XURRIYAATHA INIIS-SO’ODKÀ II DEEGAANGKE.....	18
QODOBKY 27AAD-XAQY KU QIIB-GALKÀ SIYAASADDA.....	18

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

QOTHOBKY 28 AAD-XURRIYATHÀ XIIRFATHO, SHAQETHÀ II MIHNADDÀ.....	18
QOTHOBKY 29 AAD-HARIIRKY SHAQATHÀ.....	19
QOTHOBKY 30AAD-BAY'ADDA.....	19
QOTHOBKY 31 AAD-HANTITHA.....	19
QODOBKY 32 AAD-DHAQAALAGA II XUQUUQTHY BULSHITHY	19
QOTHOBKY 33 AAD-DARYEELKA QOOYSKY.....	20
QOTHOBKY 34 AAD-OWLAADDA.....	20
QOTHOBKY 35 AAD-WALBARASHY	21
QOTHOBKY 36AAD-DHAQANKY II LUQATHY.....	21
QOTHOBKY 37 AAD-XAQÀ WAR-HELOOWKÀ.....	22
QOTHOBKY 38 AAD-GO'AAMATHY MAAMULKY	22
QOTHOBKY 39 AAD-XAQÀ DACWADA II ISDIFAACA	22
QOTHOBKY 40 AAD-HADIG, HABAAS II EED SHAQSY	22
QOTHOBKY 41 AAD-INIIS-NAGAWKY EETHEYSINIYAALKY II DEMBIILYAALKY.....	23
QOTHOBKY 42 AAD-QAHOOTIGY II MEGENGELISKÀ	23
QOTHOBKY 43 AAD-XADDIDOWKÀ XUQUUQTHÀ.....	23
QOTHOBKY 44 AAD-REED-ANG XAQSOOROWKY KÀ-XADGUTHUBKÀ XUQUUQTHÀ.....	24
QOTHOBKY 45AAD-FASIRAADY XUQUUQTHY AASAASIGY EH.....	24
QOTHOBKY 46 AAD	25
UTUBKY 4AAD - WAAJIBAADKY JAMHUURIGY EH.....	25
QOTHOBKY 47 AAD - WAAJIBAADKY MUWAADHINKY	25
UTUBKY 5AAD - DHUL, HANTY II DEEGAANG	26
QOTHOBKY 48 AAD – DHULKA	26
QOTHOBKY 49 AAD – INIIS-NAGOOWKY HANTITHY.....	27
QOTHOBKY 50 AAD – KHEYRAADKY DABIICIGY II DEEGAANGKY	27
UTUBKY 6AAD-METHELAADKY SHACABKY.....	28
QOTHOBKY 51AAD-MABAAD' IITHA GUUD E METHELAADY	28
QOTHOBKY 52 AAD – AXZAABTÀ SIYAASIGY EH.....	29
QOTHOBKY 53 AAD – HEER-DHAGANKY GUUD E AXZAABTÀ SIYAASIGY EH.....	30
QOTHOBKY 54 AAD HEER-DHAGANKY WAQTIYAALKÀ DOORASHATHY.....	30
UTUBKY 7AAD- QAABDHISMEEDKY FEDERAALKA EHE JAMHUURIYADDA.	30
QOTHOBKY 55 AAD-QAABDHISMEEDKY JAMHUURIYADDA.	30

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

QODOBKY 56-MABAADI'DA FEDERAALKA EE JAMHUURIYADDA	31
QODOBKY 57-HIRIRKY ING DHEHEEYI HEERERKY DAWLIDI	31
QOTHOBKY 58 AAD- WATHA-XAAJODYAALKÀ DOWLIGA EH	32
QOTHOBKY 59AAD –DAWLADDA HOOSE II MAAMULKY	32
QOTHOBKY 60 AAD-QIBINGTY OWOOTHO	33
QOTHOBKY 61AAD-DHAGANG-GELINTÀ OWOOTHO WITHAAGÀ EH II SHARCI-DEJHINTÀ XUKUUMATHOGA DOWLATHO-GOBOLEE	34
QOTHOBKY 62 AAD- WAKIILASHATHÀ OWOOTHO	34
QOTHOBKY 63 AAD-ARRIMO MAALIYADY	35
QOTHOBKY 64 AAD-MAXKAMATHOO	35
QOTHOBKY 65AAD-SHAQAALAGA DAWLADDA RAYADKY EH	36
QOTHOBKY 66 AAD-OWOOTHOO HUKUUMYDDY FEDERAALKA OO TAAGERAW NITHAAMKY FEDERAALKA	36
QOTHOBKY 67 AAD-MAGAALA-MATHIITHY QARANGKA	36
MERESHATHY 1AAD (CAASIMÀ KY DHAH-TAALÀ DAWLO-GOBOLEED	37
MERESHATHY 2AAD (DEGMATHÀ CAASIMATHA FEDERAALKA)	37
MERESHATHY 3AAD (CAASIMITHY EH DOWLO-GOBOLEED)	38
QOTHOBKY 68AAD-HALLINTA KHILAFAADKY	38
QOTHOBKY 69AAD-SOOHIMO DOWLATHO-GOBOLEE	39
QOTHOBKY 70 AAD-SUUBIYAWKY DOWLATHO-GOBOLEED USUB	39
QOTHOBKY 71AAD-OGGOLAANSHITHY HAKI DARSAMOOWKY JAMHUURIYADDA	40
UTUBKY 8AAD-BAARLAMAANKA FEDERAALKA	40
QOTHOBKY 73 AAD HILKY GOLAGA SHACABKÀ	40
QOTHOBKY 74 AAD HILKY GOLAGA WAKIILATHA DOWLATHOO-GOBOLEE	41
QOTHOBKY 75 AAD- HUBING-NIMAATHY GOLAGA SHACBIGA	41
QOTHOBKY 76 AAD-HUBUNG-NIMAATHY GOLAGA WAKIILATHA DOWLATHOO-GOBOLEE	41
QOTHOBKY 77 AAD KU-MIDNAGATHOOWKY II WAAYAWKY HUBINGNIMATHA	41
QOTHOBKY 78AAD-MUDDITHY HILKY HUBNO BAARLAMAANKA	42
QOTHOBKY 79 AAD HILKY HUBNO	42
QOTHOBKY 80 AAD – AFHAYEENGKY II KI-HIGEENGKY LAMMATHA GOLO	43
QOTHOBKY 81AAD-MUDDATHY HILKÀ	43
QOTHOBKY 82AAD-FIDHIYITHY	43
QOTHOBKY 83AAD-SHAL-DIROWKY GOLGA SHACBIGA	44
QOTHOBKY 84 AAD-HEERAR-HOOSAADHEE	44
QOTHOBKY 85AAD TIRITHY SHIRIRKY KU QOBSOMAYAANG (QUORUM)	44
QOTHOBKY 86 AAD-GO' AANG DEERAWKY	45

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

QOTHOBKY 87AAD-HABRAA'A SHARCI-DEJHINTÀ BAARLAMANKA	45
QOTHOBKY 88AAD-OGGOLAASHATHA SHARCI II SUURTGALNIMAATHY REED-HANGKANAGAWKY BAARLAMAANKA AMA MAXKAMATHA DASTUURKA	46
QOTHOBKY 89 AAD-GUDDIYAALKY	47
QOTHOBKY 90 AAD KIQIIBGALKY WASIIRITHY E FIDHIYITHY BAARLAMAANKA	48
QOTHOBKY 91AAD-AWOOTHY KIQASAWAWKY KIQIIBGALKY FIDHIYITHY	48
QOTHOBKY 92 AAD-XURRIYAATHY HATHALKY I HASAANADDY MUTHUNIYAALKY BAARLAMAANKA	48
QOTHOBKY 93 AAD-HOGGAAMIYAGY MUCAARADKY	48
UTUBKY 9 AAD LAANGTY FULINGTY FETHERELAARKY	49
MERESHATHA 1AAD: NITHAAMKY BAARLAMAANIGY	49
QOTHOBKY 94 AAD-HAWLA MATHAWIINAGA	49
QOTHOBKY 95 AAD-SHURUUTHO MATHAWIINA LAKÀ NOGOTHÀ KORO	49
QOTHOBKY 96 AAD-DOORISHITHY MATHAWIINAGA II MATHAWIINA KIHIGEENG.....	50
QOTHOBKY 97AAD- HIL-KA-LAALOWKY AMA HIL-KA-QAADOWKA MATHAWIINAGA.....	50
QOTHOBKY 98AAD-MUDDATHY HILKY MATHAWIINAGA	50
QOTHOBKY 99AAD-OWOOTHO MATHAWIINAGA.....	50
QOTHOBKY 100 AAD-ISTQAADDY MATHAWIINAGA	51
QOTHOBKY 101AAD-KI-SIMAGY MATHAWIINAGA.....	51
QOTHOBKY 102AAD-BINNAAWAASHATHA HAFIISKY MATHAWIINAGA.....	51
QOTHOBKY 103AAD-DHAARIYOWKY MATHAWIINAGA	51
RA' IISUL-WASAARAGA II GOLAGA WASIIRITHY	51
QOTHOBKY 104 AAD - HARIIRKY KU DHAHOOYI RA' IISUL-WASAARAGA II MATHAWIINAGA.....	51
QOTHOBKY 105 AAD-MAGA' AAWOWKY RA' IISUL-WASAARAGA.	52
QOTHOBKY 106AAD-KALSOONI-SIINTY XUKUUMADDA II BARNAMIJSHE.....	52
QOTHOBKY 107 AAD-HIL-KU-QAATHAWKY RA' IISUL-WASAARAGA	52
QOTHOBKY 108 AAD-MAGA' AABOWKY WASIIRITHY.....	52
QOTHOBKY 109 AAD- HIL-KU-QAATHAWKY WASIIRITHY.....	53
RA' IISUL-WASAARAGAA HILKY KY QAATHY KORO WASIIRATHY, SI KALYÀ AMA OWOOD KALÀ OO HILKY KU QAATHY KORTOONÀ MA JERTY.	53
QOTHOBKY 110 AAD-EDKY KALSOONITHY KULI NAGASHITHY	53
QOTHOBKY 111 AAD-XUKUUMATHA HIL-DEERSINGTY	54
QOTHOBKY 112AAD-DHAARTY.....	54
UTUBKY 9AAD-LAANGTI FULINGTY EE FEDERAALKA	54

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

HULISHIDY 2AAD: NITHAAMKY MATHATOOPYITHY	54
QOTHOBKY 94 AAD-MATHAWIINAGA JAMHUURIYADDA	54
QOTHOBKY 95 AAD-SHURUUTHO MATHAWIINAGA	54
QOTHOBKY 96 AAD-DOORISITHY MATHAWIINAGI II MATHAWIINY KI-HIGEENGKI	54
QOTHOBKY 97AAD-HA MAGA'AWOWKY MUSHARRAXA	55
QOTHOBKY 98 AAD-HIL-KIQAADAWKY MATHAWIINAGA.....	55
QOTHOBKY 99 AAD-MATHAWIINA KIHIGEENKY	56
QOTHOBKY 100 AAD- MUDDATHA HAFIISKY MATHAWIINAGA II MATHAWIINY KI-HIGEENGKY	56
QOTHOBKY101 OWOODDA MATHAWIINAGA.....	56
QOTHOBKY 102AAD-HILALKÀ MATHAWIINA KI-HIGEENGKY	57
QOTHOBKY 103AAD-BINAAWAATKA HAFIISKY MATHAWIINAGA	57
QOTHOBKY 104AAD-HABKY ISTIQAALADDA MATHAWIINAGA.....	58
QOTHOBKY 105 AAD-BINAAWAANGTI HAFIISKI MATHA-WIINAGY	58
QOTHOBKY 106-DHAARTI MATHIWIINAGY	59
QOTHOBKY 107AAD-GOLAGA WASIIRITHY	59
QOTHOBKY 108AAD-DHAARTY WASIIRATHY	59
UTUBKY 10AAD-GARSOORKA	60
QOTHOBKY 113 AAD-OWOODDA GARSOORKA JUMHUURIYDDA.....	60
QOTHOBKY 114 AAD-MATHABINNAWAANTA GARSOORKA	60
QOTHOBKY 115 AAD-HABKÀ DACWA QAATHOWKÀ	60
QOTHOBKY 116AAD-NITHAAMKÀ MAXKAMATHEE QARANKA	61
QOTHOBKY 117 AAD-DHISMATHA MAXKAMATHA DASTUURKA.....	61
QOTHOBKY 118-DACWA GUDBIN	62
QOTHOBKY 119AAD DA'WAD IN GUDBIYAWKI MAHKIMITHO KALÀ	62
QOTHOBKY 120AAD-MAXKAMATHA SARA	63
QOTHOBKY121 AAD-MAHKAMATHO GAARKÀ EH	63
QOTHOBKY 122 AAD-MAXKAMATHA RACFAANGKA II MAXKAMATHA DEREJATHA KOWAAD	63
QOTHOBKY 123 AAD- KHILAFAADKA LAKA SHAL-TARTIIRA HEER-DHAQAMEEDKY	63
QOTHOBKY 124 AAD-MAGA'AWAWKY GARSOORAYAALKY.....	63
QOTHOBKY 125 AAD-MUDITHY HIKY GARSOORAYAALKÀ	64
QOTHOBKY 126 AAD-GOLAGA ATHEEGI GARSOORKA E MATHABINNAW	65
QOTHOBKY 127AAD-HUBNOOGA GOLAGA ETHEEGGÀ GARSOORKA	65
QOTHOBKY 128 AAD-HAFIISKÀ HEER-ILAALIYEEGA GUUD.....	66

UTUBKY 11AAD GUDIYAALKA QARANGKA, HAFIISEETHA II HEY'ATHO MATHABINNAW	67
QOTHOBKY 129 AAD-MABAADI'THY GUUD	67
QOTHOBKY 130 AAD-HUBNO GUDIYITHY MATHABINAW.....	67
QOTHOBKY 131AAD-MAGA'AWAWKY HUBNO GUDIYAA	67
QOTHOBKY 132 AAD-SHURUUTHO HUBNO GUDDIGA MATHABINNAW	68
QOTHOBKY 133AAD MUDDUTHY HILKY.....	68
QOTHOBKY 134 AAD-HIL KU-QAATHAW.....	68
QOTHOBKY 135AAD-WAAJIBAADKA OGAALWARANKA.....	69
QOTHOBKY 136AAD-KA-DHAQANGKY UTUBKY	69
QOTHOBKY 137 AAD-HAFIISYITHY MATHABINAANG	70
UTUBKY 12AAD-HEERERKI SHAL GEDISING KY SAABSAN SHAQAALAGA DOWLATHA RAYIDKY EH.....	70
QOTHOBKY 138 AAD-QIYAMKA SHAQAALAGA DOWLATHA RAYIDKY EH.....	70
QOTHOBKY 139 AAD-ILAALINTA XUQUUQTHA SHAQAALAGA DOWLATHA OO RAYIDKY EH.....	71
UTUBKY 13AAD- DOWLO-GOBOLEEDKY	71
QOTHOBKY 140 AAD-HAYATHO DOWLO-GOBOLEEDKY	71
QOTHOBKY 141 AAD-MABAADI'THY DESTUURITHY DOWLO-GOBOLEED	71
QOTHOBKY 142 AAD-SUUBIYOOGA DASTUUR DAWLO-GOBLEEDKY	71
QOTHOBKY 143 AAD-WAL-KUBEDELAWKI DESTUURITHY DAWLID-GOBOLEED	72
UTUBKY 14AAD-MAALIYIDY GUUD	72
QOTHOBKY 144 AAD-MABAADI'ITHY MAALIYIDDI DAWLADDY	72
QOTHOBKY 145 AAD-AWOODI DAKLI-ARUURINGTI /KUUSOWKI	73
QOTHOBKY 146 AAD-ANGSHUUR HA-ROGOWKI.....	73
QOTHOBKY 147AAD-NOO'YITHY QIBIYAWKI DAKLIGI DAWLIDDI FETHERALKI SIYAASI DOWLITHO KALA	73
QOTHOBKY 148 AAD-MABADI'ITHY HAGAASI QIBINGTY LA'AGO.....	74
QOTHOBKY 149 AAD-AMAHASHATHY	74
QOTHOBKY 150 AAD-HANGTI GUUD	75
QOTHOBKY 151 AAD-QIBINGTY II QOONGDEYNTI DAKLIGA	75
QOTHOBKY 152 AAD-MIISAANIYIDY SINIDLEGY E FEDERAALKI	75
QOTHOBKY 153 AAD-QARASHYITHY KU-HOR ANSIHINTY BAARLIMAANKY EE MIISAANIYAD SINIDDEEDKY	75
QOTHOBKY 154 AAD-QARASHYITHY LAMI-FILANGKI EH	76
QOTHOBKY 155 AAD-HISAABAADKI II HANGTI-DHOORKI HAY'ATHO DAWLADDY	76
QOTHOBKY 156 AAD-HELIISKI BATHEE'ATHO II ATHEEGYITHY	76

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

QOTHOBKY 157 AAD-GUDDIGI MAALIYIDDI.....	76
QOTHOBKY 158 AAD-GUDDIGI HANGTI-DHOORKI MATHYBINAAW EE FEDERAALKI/HANGTI-DHOORIGI GUUD.....	77
QOTHOBKY 159 AAD-BANGIGI DHEHE.....	77
QOTHOBKY 160 AAD-QEYRAADKI DALKI.....	77
QOTHOBKY 161 AAD-SHARCI DIJINGTY FEDERAALKI EE ARRIMO MAALIYADEED.....	78
UTUBKY 15AAD-NEBEDDI II AMNIGY.....	78
QOTHOBKY 162 AAD-HOOLO AMAANGKI E JUMHUURIYADDA.....	78
QOTHOBKY 163 AAD-KORMEERKA IITHIMITHY QALABKI SITHY.....	79
QOTHOBKY 164 AAD-MABADI'THY IITHIMITHY QALABKI SITHY.....	79
QOTHOBKY 165AAD-KI-TAGRIFALAWKI AWOODI.....	79
QOTHOBKY 166 AAD-AMARRI ED SHARCI DORRI EH.....	79
QOTHOBKY 167AAD-KORMEERKI RA'IDKI E IITHIMITHY QALABKI SITHY II NEBED SUGIDY.....	80
QOTHOBKY 168AAD-BILIISKY.....	80
QOTHOBKY 169-HAALIDY DEG-DEGY EH.....	80
QOTHOBKY 170 AAD-SHARCIDIJINGTI.....	81
UTUBKY 16-AAD QOTHOBOTHY GUUD.....	82
QOTHOBKY 171 AAD-WAL KU BEDELKI DASTUURKA.....	82
QOTHOBKY 172 AAD-HADITHOWKI WALKU BEDELOWKI DASTUURKA.....	83
QOTHOBKY 173 AAD-DIB-ING-FIIRIYAWKI DASTUURKA.....	84
QOTHOBKY 174 AAD-DHAGAN-GILIN- NOGATHOWKY.....	84
QOTHOBKI 175 AAD-HIR-GILINGTY DASTUURKA.....	84
QOTHOBKI 176 AAD-SII DAREERAWKI SHARCIYITHY HOR ING JERY.....	84
QOTHOBKY 177 AAD-WAAJIBADKI DOWLIGI E AALAMIGI E.....	85
QOTHOBKY 178 AAD-AFTI.....	85
QOTHOBKY 179 AAD-BURINGTY AHDIGY FEDERAALKI KI-MEEL-DEERKI E.....	85
JADWALLADI.....	86
JADWALKI 1AAD-DHAQANGALKI DASTUURKA [WELI MAL GO'AAMINI].....	86

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال



JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Gogoldhig

Unu oo eh dadwiinaga Soomaaliyeed oo si dhab eh ang rumaasang Alla-wiingi (swt), oo nahariistiisna ka raja leh:

- ❖ Weybaa ka markaati enaa ini ing jerni wal kala oo xaq laka caabudaaw aang ka hayni Alla-Wiinaga ii ing Naba Muhiammad (scws) éyi Rasuulshey ii nabishey runti eh;
- ❖ Weybaa diiddang naa qaab kasti oo eh adeegsi hoog sharci dorro, weybaana qirsang naa adaalad-dorithii ii gefekii hor niingki dhiyi;
- ❖ Weybaa ki mideysangnaa ing ha afjarni olaadda ii qalalaasaga daba-dheeraatheeng oo dalkaana ku jeraang;
- ❖ Weybaa aqoonsangnaa halgankii dhiirriigilinty lahaayi oo ummuddaana hang galli si ang tiigsaty nolol fayleh ii nafhurrkii hoggaamiyaalkaana taariikhiga eh ha galeeng hureeyowky ii inis-sheenowkii haka hool galeeng oo dalka kaani koo ka weeli;
- ❖ Weybaa mar kali xaqiijiyaanee ing Soomaaliya ety dal haliinkoo ley eh;
- ❖ Weybaa ang surung naa ing unu dhaliini nebed waarta, isly madaasna ang horwadni midnimithy ki dhising federalnimy ii hukun-feylahaang;

Saas dartiye, unu oo oqoonsang aasaaska Share'addi Islaamka dijnithi, ii unu oo hur eh weybaa go'aansanney oo dooranney ing unu qaadani Destuurka kan eh si ang nagathi kaabadkii tabtathii hori oo laka shalgohi lingky guthuby toogty ha dareerti oo fey leh, oo ummudaana Soomali isqabshee too ka nagaty wani ki watha noolaati.

Weybaa Alla-Wiinagy (swt) ku tuugaanee ing nahariistiis niingka deeqa, umudaanana too mideysang niingka weely si dalkaana ang deeri barwaaqa ii guul... Aamiin

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال
وبالله التوفيق

أمين

Utubki 1aad –Baaqa Jamhuuriyadda

Qothoby 1 aad-Mabaadi'da Asaasiga

- (1) Destuurka Soomaaliya weybaa saldhig ing eh Qur'aanka Kariimka ii Sunnathy Nabà Muhammad (sws), weybaana hormariyeey Maqaasidka Share'atha ii adaaladda bulshy.
- (2) Soomaaliya wey buwaa dal islaam eh, dadsheni ki abtirsithaayang dunithy Arabty ii Afrikaangky.
- (3) Dastuurka Soomaaliya weybaa dhiirigeliyee oo dhooreey huquuqthy Bani-Aadamky, talinty sharcigy, shuruuthoo guud oo heerka aalamigi eh, adaaladdy, xukuumà liing dhanyi oo ky dhisan isla-talathow, shalbahanaanta owoothooga, sharci-dijninty, fulinty ii garsoor mathabannaan oo leh nidaam ki dhising la-hisaabtang ii hufnaang oo ka jawaabayaang danayaalka dadwiinagi.
- (4) Bilaanti ini yoo ku mid nagathaang hay'atho guud ee qaranka, goony haang darajooyinki linis doorathaw ii hang linis magadhowaw oo seddithi laamood oo Dawliddi eh ii Guddiyaalka Mathibinaaw e qaranka.

Qothobky 2aad-Dawladda ii Diinty

1. Islaamki weybuwa Diinty Dowliddy
2. Diin Islaam ang ahayni malka faafiyyi koro dalky;
3. Mal ha saara koro Sharci ing waafaqsanayni Mabaadii'da Guud e Share'athy Islaamkiny ii maqaasiidshee (anglajeedlayaalshe).

Qothobky 3aad- Dastuurka

1. Dastuurka Soomaaliya oo ka salaysang mabaadii'da share'atha Islaamka yaa eh shar'igi dalka angka koreéyi , huumaddani usu ang hoggasamaasy, weybu waa kang shal wedaaw siyaasathy ii go'aamatha huumatha qaybooshee oo dhong;
2. Sitha ki husung utubka tumunaad ee Dastuurka, mahkamad ya buriyyi korty sharci kasty ama tillaaba maamul oo haku horjeethaang Dastuurka;

Qothobky 4aad-Gobnimatha Jumhuuriyadda

1. Soomaaliya weybuwaa Jumhuuriyi, Federaali eh oo gob eh, weybaana ky dhisantaa misilaad dadwiinagy o long dhonyi oo dimuqraadi eh;
2. Shacabka Soomaaliyeed haliinkoowu waana mal shal qiibiyi koro;
3. Gobnimaathy Jumhuuriyadda Soomaaliya muqaddaswu waana mal haka hadguduby koro;

Qothobky 5aad-Afka Rasmigy eh

1. Afka rasmiga eh e Jumhuuriydda Soomaaliya weybuwaa afsoomaaligi oo ky koobang: Mahaa-tiri, i Maay-arti ii Arabi sithy ki ed Jadwalki.

Qothobky 6aad-Astaanta Qaranki

1. Alanka Soomaaliya sithi liky bandhiky qiibta A ee Jadwalka koowaad wey etaa buluug midib-furun oo dhaty eng taally hiddig ed shan gees eh oo mathaaal simang leh;
2. Astaanta Jumhuuriyaddy Soomaaliya, sitha laky edaayii qiibta B ee Jadwalka koowaad wey ka koobantaa gaashaan buluug oo leh tarash dahabi eh, dhatiny angka taally hiddig shangees eh oo qalang ka dhiinsyng. Gaashaanki korshey weybaa ka yaalaan rukumy arbeed harardhang oo leh shang matha dahabi eh oo lamaatha rukun ber jirka ehna ber-dhimang eh. Heeraarka lammaathi dhini weybaa ka haayana lamma shibeel oo anis tusmaaysang, weyna ka shal kor surungniina lamma warang oo aarada gaashaangka hoostiis iska dabar-dhaafsang, weybaana ka weheliyee lamma owbaar oo diilling ed ka qufulung.
3. Sharci goony eh ya lahaka saree Heesta Waddanky;
4. Sharci goony eh waa lahaka saaree billathoo sharafta;
5. Baarlamaanka ing dejniyaa sharci maamuuskà ii ihitiraamki Alanka, Heesta Qaranki ii Billathoo sharfta muthungyiing.

Qothobky 7aad-Dhulka Dawladda

1. Gobnimatha Jumhuuriyadda Soomaaliya weybaa koobaasee dhulki Jumhuuriyadda dhammaantiis, oo ka jiraang berriga, jasiiratho, biyoo goboleed, uurshoo, hawada ii geyiqaaradeedkaba.
2. Dhulka Jumhuuriyadda Soomaaliyeed mal shal qiibiyi koro;

3. Wal-ka-beddelow kastà ka saabsan dhulka Jumhuuriyadda Soomaaliya Guddoon afti Qarameed eh ley laki oggolaatha koro;

Qothobky 8aad-Magaalamathiitha Qaranka

1. Muqdishow, oo ling gorothaaw Hamar waa eh Magaalathiitha Jumhuuriyadda Soomaaliya. Maqaamka Magaalathiitha ka lata qaabdhismeedka federaalka Jumhuuriyadda weybaa ki husungtaa utubky 7-aad ee Dastuurki.

utubky 2-aad – Jinsiyidny

Qothobky 9aad-Huquuqthy goonigy in eh Muwaadhiniingty

- (1) Qof kasty oo ki dhalathy Soomaali guthaashey, dhalashi haang weybuwaa Soomaali.
- (2) Muwadhiniinty yoogo siming weybaa leyiiny:
 - (a) Huquuq, muthunaang ii faa'idooying muwaadingnimy, hanaso Dastuurka ki haddidang; ii
 - (b) Baasaboor Soomaali, ii dokumenti kasty oo diiwaangelin ama oqoonsi eh oo Dawladda hang saartà muwadininty.
- (3) Muwaading kasty wali baasiboorki ii dukumentiyaa kely ki husang faqradda (1) (b) weybaa liinki diithy kore, ama laka laali kore, ama la'angka qaatha kore si sharci eh oo waafaqsang habraaca qothobky 43-aad.

Qothobky 10aad-Heloowky ii haaysathoowky Jinsiyaddy

1. Jinsiyatha Soomaliyeed weybaa laki hela koree dhalasha ii soomaaliyeeng.
2. Qof jinsiyidny ka dhalathi mal ky qaathi koro jinsiyaddy hatta hoo qaathatha jisiyi dal kala;
3. Qof jinsiyidny ka dhalathi ama ka heli soomaaliyeeng is shey yaa ang tanaasula kore jinsiyidny Soomaali;
4. Jinsiyidny maka dhumaas guur ama furiing.

جمهورية الصومال

Qothobky 11aad-Ang-dhlaashatha Jinsiyiddy

- (1) Qof kasty oo ki dhalathi Soomaaliya gudaashee muwaadhin Soomaali wu;
- (2) Qof kasty oo ki dhalathy Soomaaliya bannaanshee, dhalsha haang Soomaali wu, hoo aatha ama awki kooshoo ka dhalathi Soomaaliya gudaashee ama isir ahaang Soomaali éyi ing;
- (3) Qodobkung weybaa si simang ang saameeyee qof kasty oo dhalathi taariikdi Dastuurka dhagangali, ka hor ama ka reed;
- (4) Awlaaddi luku heli Soomaaliya gudaashee, oo da'thiis ka yarta, ama ang muuqata ing siyeed jirnima ka yarta, oo jinsiyaatha waalidiintiis la'ang gorothaana, wey lang aqoonsathee ing Soomaali eyi.

Qothobky 12aad-Muwaadhing-nimaathi liki heli Soomaaliyeeng

- (1) Qof kasti oo angka yaraang shan sini has qobeeng muwaadhin Soomaali eh, weybaa xaq ang layaa ing Soomaalinima dalbathy;
- (2) Awlaad muwaadhing ang hayna, haato qof muwaadhing eh ha korsithi, wey xaq ang layaa ing la soomaliyeyi, waalidkii ha korsathi yaa ang dalaba koro ama maddii 18 jirsatha naf ahaantiisaa soomaalinima ang dhalbatha koro;
- (3) Qofkii shan sini hariir eh oo si sharci eh hang deganaayi Soomaaliya, oo shuruuthoo sharciga jinsiyiddina dhamaatiry, weybaa xaq ang layaa ing soomaalinima dalbatha;
- (4) Shardiga shanta sini qof xaq angka weeldhathaw ing laka soomaaliyeéyi guur dartiis ami deggenaasha maka hiring ing qofka shuruuthoo ang buuysameeng taariikhda dhagangalka Dastuurka ku hor ami ku reed.

Qothoby 13aad-Kali nagashithy Soomaaliyeengta

- (1) Qof jinsiyaatha ka heli soomaaliyeeng wal kulu nagsathy koro jinsiyaatha hooMaxkamad owood ang leh arrimoogung ha ogaata ing:
 - (a) Jinsiyaatha ka heli beeng-abuur, inis nakaysiing wal usu ang hayna, ama qariya xaqiiqa sugung;
 - (b) Iyeethoo dalka dagaal ki jara qofkii si sharci ang hayna la ganaasatha, hariir la weeldhatha, hool iskaashi eh la weeldhatha, oo eddaata ing si ogaal eh odowka ang taakuleeyi dagaalkaas;
 - (c) Maddii la soomaaliyeeyi reedshee laka hukumi qiyaana qarang ama dembi kala oo muthung-maris-shey inki yaraang tothoba sana oo habbis eh;

- (2) Qofka liing haaysiithy ini jinsiyidi ka heli dhalsha sitha ka husang qodobka 11 (4) wal kala nagatha koro jinsiyiddu hoo Maxkamad awood sher'e ang leh go'amithy:
- (a) Inii usu Jinsiyiddu ka heli beeng-abuur, anis nakaysiing wal usu ang hayna, ama qariya xaqiiqa sugung;
 - (b) Inii usu ama tang waalidiintii dhalli la ogaathi ing iyoo jinsiya kala eyiing, ama
 - (c) La ogaatha ing de'diis siyeed jir ka wiinaayti maddii dalka gudaashey laka heli.

Qothobky 14aad-Sharci Ing Dijninty muwaadhinnimatha

- (1) Baarlamaanka ha saara koro shar'i habeeyaaw:
- (a) Ha galowka dalka ii deggenaashathi dadka shisheeyaga eh;
 - (b) Deggenaashatha roogtada eh;
 - (c) Sitha qof shisheeye eh ka hela koro jinsiyatha soomaali;
 - (d) Qaabka qof aktiyaarshey angka tanaasuli koro jinsiyiddu Soomaali;
 - (e) Habra'a jinsiyiddu Soomaliyeenta ka kooyti lang kula nagatha koro, ii
 - (f) Guud ahaang dhagang geliyoowka qothobee Utubkung ka husang.

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

Utubky 3-aad-Huquuqthi Aasaaske eh

Qodobki 15aad-Dhagang Gilinty Huquuqthy aasasigy eh

- (1) Huquuqdi asaasigy ii huriyaddy liki aqoonsithi utubkun, weybuwaa ing markasti li dhoori marki sharci li dijiyaw. Saas haatow qof kasti, hay'ado Dowliddi' oo heer kasti ii hay'ado gaarke eh ii Saraakiile dowlada' kolki iyoo gududaayan hooliyoo, waa ing ilaaliyaan huquuqde ki husun utubkun.
- (2) Waajibaadka dowlada miki koobin inii dhowrte huquuqdi dadki, weybase kasii waajib ehe inii talaabooyin maangal eh qaadi oo liki ilaaliyaw hadguthub angku kooyow dad kale.
- (3) Huquuqde liki aqoonsidi utubkung sharci yaa liki hatheeye kore sida ku husung qothobky 43-aad.

Qodobky 16aad-Karaamady Insaanky

- (1) Huquuqda Eethenaage weywahe deeq Eebehey siiyi qof kastoo Beni-eethen eh, waana ifyaalke karaamada eethinaaga wu. Saas daraadiye, may ki hadguthubi koro, dhooroowshena waajib dadka oo dhan saarin wu.
- (2) Awooda Dowlada waa inii marna ing nagane to liinky dhaqamaaw qadarin laanti karaamatha eethineega.

Qodobky 17aad-Sinaanteh

- (1) Dadky dhan sharcigy ing siminyiin.
- (2) Dawladda sibbeh qof ming takoori korte. Takoorki reebeng wey ku mid eh singji, methib, qabiil, isir, heeb, asal bulshadeed, afguri ama luqatha, lab ama dheddig, meel leke dhalidi, diin, siyaasi ama ra'yi shal gedisen, mihne ii hantà.
- (3) Fal takoor eh wu hoo natiijadiis nagati koo hor surimaw ama ariiriyaw xaqa qofka, hataa hoo falkaas éyi koo si maag-ang-weel eh linki suubineh.
- (4) Dowladda miing aragaasi fal takoor eh barnaamijyaalka ling qorsheyi ing sinaang buuti in liki deersiye dad ama kooh hor lengki jeysithy takoor ama tacaddi.

Qodobka 18aad-Xaqa Nololeh

Qof kasty weyba xaq ing leyaa nolol.

Qodobka 19aad-Adoonsy, Midiiding ii hawaang angke shaqaysidow

Sibby qof mal ang oddoonsathà koro, mayne midiidingsathà koro, mayne ka gana'sthà koro, hawaang qasab ehnà mal anka shaqaysathà koro.

Qodobka 20 aad-Huriyada ii Nabadgelinteh Qofnimaatha

- (1) Qof kasty wey xaq ing leyah huriyathiis shakhsiga eh.
- (2) Qof kasty wey xaq ing leya nebedgelyady qofnimaathiis. Nebedgelyada qofnimi wey ky mid ehe ing ka bedbaasanaatha hathag sharcidorro eh, ama qaab kasty oo cunfi eh oo enki kooyo koro dhinige dowlada ama dad goony eh, qaab kasto jirdil eh ii inee ka nebedgala qaab kasty oo nahariisdorro eh, dhaqan lid ky lid ke eh Eethenenimaatha ama liidid eh ama ciqaab eh.
- (3) Qof kasty wey xaq ing leya' bedqabka jirshey, maana lakà xadguthuby koro. Qofne mal ka qasaba koro ing lakà suubiy tijaabe takhtareed ama tu cilmibaaris eh, ho qofka ama qaraabidiis ing dhaw ang oggolaana ama ing jirne tali dhiibi heeldheere caafimaad maddii qofka sharciyang awood iniing lahaayne inii wal ogolaatha.
- (4) Gudowka Firooniga ehe dheddigoodka weywa arring haka horjeeda Shareecada, waana reebantah.
- (5) Harridowka ilmoo uur-ka-jirky eh weywa arring haka horjeedda Shareecada, waana reebantah, weybaana la oggolaatha koree keliyah hoo maka-maaramey nagata oo nolol Aatha laka bedbaathiyaw, gaar ahaang.

Qodobky 21 aad-Huriyiddi abuurwka ii ky-mid-nagathowka Ururooga

Qof kasty wey xaq ang leyaa inii dad kalà ka biira-darsama ama urur. Xaqaas wey ku mid ehe inii abaabulà ama ku mid nagathà ururoo shaqaale. Wey kaloo xor ang éyaa idna angka biirne, maana laka hawaaniyi koro.

Qodobky 22 aad-Hurriyaddi Diinta ii Caqiididy

- (1) Qof kasty wey hur ang éyaa inii ky dhagama diintiis.
- (2) Qofka Muslimky eh mukubaha koro diintiis;
- (3) Diinta ang haayneh Islaamka mal ky faafiya karo dalka.

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Qodobky 23 aad-Hurnimaada Ra'yiga

- (1) Qof kasty weybaa xaq ang leyaa inii ra'yishee ha bandhiky ii inii usu qaab kasty angudbiyi koro warkà ii afkaartà usu qobo.
- (2) Qof kasty wey xaq ang leyaa inii raadsatha oo helaana afkaar;

(3) Qof kasty wey xaq ang leyaa inii muujniyi hal abuurshay faneed.

Qothobky 24 aad-Hurmada Ruunka ii khusuusiyaadkeh

- (1) Qof kasty wey xaq ang leyaa inii liinka xadguthubny ruunshay ii khusuusiyaadshey;
- (2) Xaqa kang eh weyba qof kasty ku ilaaliyeey ing baaris sharcidorro eh laka suubiy hoyshey, ama hantithiis, ama ing lahakà duulo, ama farageling ii boob hanthiis laka suubiy.
- (3) Xaqa kang eh weyba qof kasty ku ilaaliyee inii sinnabà lahng farageliy war- isdeersiintiis ii dad kala lahadalowshey.

Qodobky 25aad-xurriyaathà Kulungkà, Binaangbakà Ashtakathà ii Weydiimà- Wathareedkà

- (1) Qof kasty weyba xaq ang leyaa inii abaabulo, ku qiib-galà kulmoo ama binaangbah oo si nebed eh ashatakoothiyo ku muujniyaayaang, iyethoo ogolaashy la'aniig baahanayny;
- (2) Qof kastehe weyba xaq ang leyaa inii weydiimà-wathareed abtugaal eh ing gudbiy hey'athoo dowladda.

Qodobky 26 aad-xurriyaatha iniis-so'odkà ii Deegaanke

- (1) Qof kasty oo si sharci eh ka deggang dhulk Jamhuuriyadda weybaa xaq ang leyaa inii si xur eh ang degy koro, angka dhah-so'othà koro meel kasty oo dalka ku mid eh, waana ku baha karo;
- (2) Muwaadhing kasty wey xaq ang leyaa hagalowkà ii rogowkà dalka ii inii helaa baasaboor.

Qodobky 27aad-Xaqy Ku qiib-galkà siyaasadda

Muwaadhing kasty wey xaq ang leyaa inii ki qiib-qaathathà arrimoo guud ee dadwiinaagà. Xaqa kang weyba ka mid ehe inii suubsathà karo axaab siyaasi eh ii inii ku qiib-qaathathà hoolow siyaasigà ehe axaabtà. Muwaadhingky qaandeerka eh weybaa intaas ang dheerà inii usu si xur eh oo cadaalad ka jartà andhiibathà codshey doorashathà.

Qothobky 28 aad-Xurriyathà Xiirfatho, Shaqethà ii Mihnaddà

Muwaadhing kastaa wey xaq ang leya ing si xur eh ang doorathy xiirfaddà,, shaqethà ama mihnaddà usu fathaw.

Qothobky 29 aad-Hariirky Shaqathà

- (1) Qof kasty wey xaq ang leyya inii halaa calaaqa hariir shaqà oo caadil eh;
- (2) Qof kasty oo shaqaal eh wey xaq ing leyya inuu usu abuuro, oona kadarsame urur shaqaale, ooneh ku qiibgalo hoolow ururkeh shaqaale;
- (3) Shaqaalà kasty wey xaq ang leyya shaqa-roojning;
- (4) Urur kasty oo shaqaale, ururoo liing-shaqeeyeyaalka ama urur liing-shaqeeye kastabà wey xaq ang leyya ing iyoo galaaang koraan gorgortang-wadareed ky saabsang arrimo shaqathà.

Qothobky 30aad-Bay'adda

- (1) Qof kasty wey xaq ing leyya degaan bey'adiis wal iniing dhimaanà, fay-qobkà caafimaadshey ii barwaaqathiis nololeed;
- (2) Qof kasty wey xaq ang leyya inii helo bey'ad laka ilaaliyi wasakh ku ii waliiba wal ang dhimaaw.
- (3) Qof kasty wey xaq ing leyya inii usu wal ka helà kheyraadka dabiicigi ehe dalkà, iyeedthoo luku ilaaliyaw ka-faa'ideysi xad-dhaaf eh oo bey'adda lur ang injeysathà karo.

Qothobky 31 aad-Hantitha

- (1) Qof kasty wey xaq ang leyya inii wal-lahaathà, ky dhagamà, ky noolaathà, isku gathy ama amantii usu fatha dad kalà ky wareejniy.
- (2) Dawladda wey si qasab eh hantà angla wareega kortee hoo dan guud jirtà, Waana ing la helaa magdhow caadil eh oo leke helliyi, ama mahikamad ha go'aamithi.
- (3) Qof kasty oo hantithiis dan guud liin kulu wareegi wey xaq ing leyee ing si deg deg eh magdhow liing siyaa.
- (4) Farqradadda 1, 2, ii 3 ee qodobkung malki dhaqaaw arimoo ka hiusun gothobky 49-aad.

Qodobky 32 aad-Dhaqaalaga ii Xuquuqthy Bulshithy

1. Qof kasty wey xaq ing leyya inii helo heer-nololeed haboong oo ka mid éyi ing, hungurà, ka filang, biyi nathiif eh ii hooy.
2. Qof kasty wey xaq ing leyya daryeel caafimaad.
3. Qof kasty wey xaq ing leyya daryeel-bulsho oo dhimaaytiring.

4. Xuquuqthà lakà oqoonsithy qothobkung weybaa ky mid ehe xaqa qof kasty ang leyi inii ilaalsathy, weydiisithy, si buutana huquuqthaas ing deerà, iyeethoo dawlaatha ama dad kalà haangka farageliyaanà.
5. Huquuqthy lakà oqoonsathi qodobkung weybaa Dawladda waajib angka dhikayaana ing:
 - (a) Inii hubiithaa ing xuquuqthung dad kalà faregeling hangky weeldhanà
 - (b) Inii dejniithy barnaamij hormaring oo xuquuqthung laka fuliyaw, hadba intii owoodiye dhagaalà ang suurtageliy kortà.

Qothobky 33 aad-Daryeelka Qoosky

- (1) Guurka weywa àsaaska qooskà oo eh saldhiggà mujtamaca, ilaalintiisna waajib dowladda saarang wu.
- (2) Dowladda waa ing darweelaa aathy ii dhalla.
- (3) Onog kasty wey waalidiintiis xaq ankà leyya xannaanà, oo ku mid éyiing walbarashà ii barbaaring. Hoohe hanaanidaas usu qoos shey ka waayooba, waa ing la'ang weelaa id kalà oo ang darweelà. Isle huquuqthung oo kalee leyiing owlaaddà dhariiq-roogga eh ii haang waalidiintiyo liing gorothaanà, waana dowlaathaa si gaar eh angka xilsaarang inii xuquuqthiyo ilaalithy, si dhamaytirang-na ang helaang.
- (4) Waalidiinte istiyoo iniisky filinaaynà wey dhalliyoo qaan-deerka eh xaq angky leyiinaa inii ang daweelaang.

Qothobky 34 aad-Owlaadda

- (1) Onog kasty madii usu dhalithy weybaa xaq ang leyya inii usu helà magà ii jinsiyad.
- (2) Onog kasty wey xaq ang leyya in luku ilaaliye dhaganhumà, laayacaad, xadgudthub ama darraaw.
- (3) Owlaadda mal ang diry koro shaqà, ama etheegyì ankà hboonaynà de'thiyo ama khatar ke'eh faydhoorshoo ama koriimithiyo;
- (4) Hoo xal kalà la waay, Owlaadda wey ley li habbisà koree muddo gaabang, maana lakà haaya koro dadkà wiiwiing dhathiyo, ingku haayni higtathiyo angka dhow, waana ing xaalad ky habboong laka haayuw. Owlaadda higtoothiyo angky dhow waa ing sida angky degdeg badang oo suurtagal eh la'ang wargeliyaa.

- (5) Owlaadda wey xaq ing leyiini inii helaang kaalmà qareengnimà oo kharajsheynà dowlatha biyaasà, si inku badbaathaang dacwad kasty oo caddaala dorro ang sheenà korty.
- (6) Owladda wey xaq ang leyiina in luku ilaaliy, waana laniing atheegsanà dagaal hubaysang;
- (7) Dantà owlaaddà yaa markastabà muthunaang leh maddii la galaw arrin kastoo maslaxadiyo khusaytà;
- (8) Ereygi “owlaad” oo qothobkung ky husung weybuwa qof kastoo de’thiis ku yertà 18-jir.

Qothobky 35 aad-Walbarashy

- (1) Qof kasty wey xaq ang leyaa walbarashy.
- (2) Xaqa walbarashethy weybaa ka mid ehe ing tacliing la rahatha, iyeethoo dowladda ama dad kalà hang faragelinà.
- (3) Dowladda weybaa ky waajib ehe inii ilaalithy ing xaqa walbarashoothà dad kalà hang faragelinà.
- (4) Dowlatha wey waajib ke’ehe inii xaqiijithy fulintà xaqa walbarashoothà owlaadda dugsiyaalka hoose/dhehe oo qasabkà ii beesà la’aangtà eh, ii ing muwaadhin kastaana helaa walbarashthà asaasigy eh. Walbarashoothà Dugsiyaalka hoose/dhehe ee dowlade waa ing ku mid haathaang ta’liinta islaamka ii aqoontà guud;
- (5) Dowladda wey ky waajib ehe ing dejniithy barnaamij hormariing oo lakà fuliyaw xaqa walbarashathà, hadba intii owoodiyee dhagaale suurtageliy korto.
- (6) Qof kasty wey xaq ang leyaa inii usu dhisyy waana maamuly dugsiyaal ii machadyaal walbarashà oo mathabinnaw, iyeetho qarashoonà usu anis qobà, haatoo hey’athoo eentung leh waa in si dhamaytirang hang buuyaang shuruuthoo maka-maaramaangkà ohoo Dowlatha dejniithi.

Qothobky 36aad-Dhaqanky ii luqathy

- (1) Qof kasty oo ku mid eh bulshoyinkà oo dhagan ahaan, ama af ahaang luku tiri badanye wey xaq ing leyiina inii ky dhaqgmaang hadbà dhagagnkii yoo doorbithang;
- (2) Xuquuqthà qothobkung ky husung waa ing lingky dhagamaa si waafaqsang xuquuqthy asaasigy ehe dastuurkung lak à aqoonsithy.

Qothobky 37 aad-Xaqà war-heloowkà

- (1) Qof kasty wey xaq ing leya inee usu hele warkà dowladda haaytà.
- (2) Qof kastehe wey xaq ang leya inii usu hele hogtà dad kalà haayaang oo liinka baahinyi ing laka fuliy ama laka ilaaliy xaq kasty oo dow liing leyi.
- (3) Baarlaamky waa ing ha saaraa sharci liki hirgilyaw xuquuqdu, hoohe ang jerne sharci eentaas eh, hay'athoo Dawladda waa ing nogothaang haanoo ang dhega nugul oo ang illing furung biyowkà hogty liingka baahiyeh intii suurtagal eh.

Qothobky 38 aad-Go'aamathy Maamulky

Qof kasty wey xaq ang leyaah ing go'aamethà haku bahaw maamulkà haathaang haano ky dhising sharcig, maangal eh oo qaathashathiyoono lahang mari hannaan cadaalad ka jideysang.

Qothobky 39 aad-Xaqa dacwada ii isdifaaca

Qof kasty wey xaq ang leyaah garsoor mathabinnaw, caadil eh, eeh ang lahayny oo laka qaathaw maxkamad dadwiinaga ang furung, waana laka galaaw waqti macquul eh, ama golaghii kalà oo awood go'aang deerow ang leh:

- a) Arring kasty oo ki saabsan xuquuqthy ii waajibadky madanige eh; ama
- b) Fal dembiyeed kastoo kalà lahakà oogi oo ciqaab lakà muthuthaaw.

Qothobky 40 aad-Hadig, Habaas ii Eed Shaqsy

- (1) Qofnà mal ky qasaby koro dembi-qirashà
- (2) Qof kasty oo laha hirà wey xaq ing leya ing 48 saac guthaantiyo là horsheenà maxkamid awood ang leh.
- (3) Qof kasty oo xuriyidiis shakhsigà luku qaathà, waa ing isla maddiba lakà wargeliya dembigy liki tuhunsijhi waana ing liing ky sheegaa af usi gorothaw.
- (4) Qof kasty oo xurriyithiis shakhsi luku qaadtha weybaa xaq ang leya inii helaa qareeng difaacaw.
- (5) Qof kasty oo maxkamad lahang hor-roojhiyi tuhun fal dembi-ciqaabeed weybaa xaq ang leyaah garsoor caadil eh;
- (6) Garsoor caadil eh wey ku mid ehe: –

- (a) Eetheysanaaga weybaa la mid éyaa qof barii' eh ama dembilaawe eh ilaa maxkama si maka-dombooytà eh angky eddayta dembigà liing haysithy.
- (b) Qof kasty weyba xaq ang leyaa inii xukunshey saldhig liinku weelnà qirasha laka qasabi.
- (c) Eetheysanaaga weyba xaq ang leyaa qareeng methelaw.
- (d) Eedaysanaga wey xaq ang leyaa inii dacwathiis goobroog ang ahaatha.
- (e) Eedaysanagy may xaq ang leyaa inii isku difaaca eddaymoo laha hordhiki oo lidkà ke'eh.
- (f) Eedaysanaaga weyba xaq ang leyaa inii liing qobothà turjumaang, hoo usu ang gorothaanà afkà maxkamadda liiky isticmaalaw.
- (g) Mas'uuliyaddy ciqaabta weybewa shaqsy, qofni may in iqaabe kore faldemby lang kali gali.
- (h) Qofny mal ing ciqaaba koro fal maddii usu galaayi sharciga demby iniing aqoonsanaatha jirny, hoo dembigaas ang hayne dembe haka horjeetha banii-Eethengka, oo lakà eddaayi qawaaniinte dowliga eh.

Qothobky 41 aad-Iniis-nagawky Eetheysiniyaalky ii Dembiiliyaalky

1. Iniis-nagowky eetheysiniyaage weyley lakà oggolaathy koree si waafaqsang tilmaangty sharcigy, ii iny helliis caalami eh oo ki waajibiyaw Dowladda Soomaliyeed nagowka eetheysaneega ama dembiilaga.
2. Iniis-nagowky eetheysaneega ii dembiilagy waa inii haatà tu waafaqsang dhaqangka ii qaanuungkà dowligy eh, waani ini baarlamaangki ha saaraa sharci lakà maamulow inis nagawka dembiiliyaalky.

Qothobky 42 aad-Qahootigy ii Megengeliskà

1. Qof kasty soomaali hang gali qahootinimy weyba xaq ang leyaa inii reed liinky nagny ama dal kale liinky qaadnà dal kelà, hoo jerte obsà muuqatoo eh ing qofkaas ciqaab kalà kulimà doono wadanka liing nagaw.
3. Baalamaanka waa inii ha saaraa sharci waafaqsang qaanuunka dowligy oo nidaamiyaaw qahootigy ama dadka megengelye weydiiska eh.

Qothobky 43 aad-Xaddidowkà Xuquuqthà

1. Xuquuqthà lakà sheegi utubkung wayba xaddithi kore sharcigy, hoohe sharcigaas usu si gaar eh liingka tibiilaana shakhsiyaad ama kooho.

2. Xuquuqung wey hadidi kore sharcigy, ama wal gooni haang liingku reebi ama arrima gaar ohoo lakà husi utubkung, hoo xaddithaadaas étta maangal le eddaay koro, lana aqbala koro, si waafaqsang qiyamkà si ed liinky eddaayi Desturkung.
3. Maddii go'aang laku deeraw xatheynta xuquuqthà oo nagaty too la aqbala koro oo maangal eh, waa ing la tihgeliyaa dhammaang arrimoo là hariirà xathaynstaas.
4. Arrimoo la hariiry weyba ku mid ehe dhabeecathà ii ahmiyathà xuquuqtha la xaddithi ii muhiimatha anglajeeddatha là fathaw ing liki deery xaddithaadda; Hihaato ing xathayntaas ata tu habboong oo liki deerow qesedkà liing dan leyi ama hihaatoy tu isla anglajeeddathaas liki deerà kari iyeethoo xuquuqthaas liing xaddinà.
5. Xaddithowka suurtagalkà ehe xuquuqthy aasasiga eh ee muwaadhinky mowsimee lakà jarà xaalathoo deg-degga eh weybaa liki sheegey Utubky 15, qothobky 169.

Qothobky 44 aad-Reed-ang Xaqsoorowky Kà-xadguthubkà Xuquuqthà

1. Sharcigy waa ing eddaayaa habra'a haboong oo liki saxaw xad-guthubyithy xuquuqthy Banii-Eethenka.
2. Daaweyowkà xad-guthbyaalkaas waa inii liki laka gala maxkama dadka si futhud dacweediyo angkà furuth furudi koraan koraan;
3. Qof kasty ama urur kastii seethy koro maxikamad à, si usu ing difaaca xuquuqthy dadka kalà oo owood anag lahaayne inii maxkamadda qof ahaanyiyoo seethang.

Qothobky 45aad-Fasiraady Xuquuqthy Aasaasigy eh

1. Maddii là fasisraw xuquuqthy ku husung utubkung maxkamady waa inii rataa tubtà yee ky deeraasa angla-jeedooyingky ii qiyamky xuquuqthaas humbaarsinying. Maxkamadda weyba tixgiliyaase shareecathà ii qaanuungky dowligi eh. Maxkamaddi weyba, sithaas oo kelà tixgiliyaase go'angmathy deereeng maxkamatho dalal kalà, yetho angky qasbynaayny ini raty.
2. Guud haang, maddii sharci là fasisraw ama la dhagang-giliyaw, maxkamad kasty, ama mathalii kalabà, waa inii tixgiliithy muhiimithy qothobeethy utubkung, intii suurtagal ehna go'aamathiyeey ky dhigtà hanoo la so'othy koraang qothobeethung.

3. Xuquuqthy aasaasigy ehe utubkung ku husug muku horkooy koraang xuquuqthy kalà oo Shareecathy Islaamka jitheeyti ii heer-dhagangky oo là saan-qaatha koro Shareecathà ii Distuurka.

Qothobky 46 aad

Guddigy Xuquuqdy Eethanaaga

1. Dawladda waa ing ye dhistaa Guddigà Xuquuqthy Eethanaga qaabilsang oo ka mathabinnaw maamulky Dawladda, oo leh ili dhagaale oo si habsama leh angka fuliy holooshey.
2. Hoolo Guddigà Xuquuqtha Eethanagy waa ini ky jeraang hormariyowky oqoontà xuquuqthy eethaneegy ii, gaar haang, shareecathà, iyoogo ing dihiyow heerar liky hirgiliyow waajibaadky xuquuqdy eethanaga; dabagalowky xuquuqthy eetheneegy e dalka guthaashey ii baarowky eetho là hariiry xuquuqdy eetheneegy.

UTUBKY 4AAD - WAAJIBAADKY JAMHUURIGY EH

Qothobky 47 aad - Waajibaadky Muwaadhinky

1. Sharee'athy Islaamky wey ilaaliyaase iniis miisaamanaantà xuquuqthy ii waajibaadky.
2. Waajibaadky wadhanigi eh sinnà goonà mal angky saara koro kà dhaganky simaanaashathy, xurri'yaadky ii xuquuqthy kalà. Saas daraadiyee, muwaadhing kasty weyba ky waajib ehe : -
 - (a) Inii nagathy waddany daacad ang eh hormariyowky ii wanaagga dalshey.
 - (b) Inii ku qiib qaathathy hoolo waltarky ang leh muwaadhinky, qoosky, wanaagga guud ii inii ku qiib qaathathy hormaringty qarangky ii bulshithy usu là noolyi.
 - (c) Inii usu hormariyi mas'uuliyathy weelidnimathy.
 - (d) Inii usu dhiirigiliy midnimithy qarangky, usugo kaalathaw muwaadhiniingty kalà.
 - (e) Inii usu hormariy mabada'a là hisaabtingky ii sher-ci- talingty.

- (f) Inii usu nagathy lang kasmà ang leh qothobathy Destuurka, si daacad ehna ang taageery, oo ang difaaca Destuurka ii shuruuctha dalka.
- (g) Inii usu haathy canshuur-dhiiby toosang, si usu angku qiib-qaathathy kharajky dowlatha si waafaqsang awoodiis wal biyoow ii sharcigy;
- (h) Inii usu difaaca dhulka Jamhuuriyidda.

UTUBKY 5AAD - DHUL, HANTY II DEEGAANG

Qothobky 48 aad – Dhulka

1. Dhulka weybuwa kheyraadky kowaad oo Soomaaliya lata ii saldhiggy nolola dadka.
2. Dhulka ing liing haaysathaa, liing etheegsathaa, oo ling maamulaa si caddaalad eh, waltar leh, oo wal hasaarow roogta ehna leh.
3. Dawladda federaalka, iyeethoo la tallathaasa dowlado-goboleed ii iddii kalà khuseeyaasà, waa ing iye suubithaa siyaasa – dhuleed qarang, ii hannaang lingky talagali maamulky ii ky dhaganka dhulka jamhuuriyadda. Siyaasathaas waa ing lakà hirgilyaa si waafaqsang owootho liky qiibiya Jadwalka 2aad waana in yee sugtaa diiwaangelinta, ka dhagangky, lahaathoowka, degameysathowka, xuquuqthy maamulky, amniga, danoo gaarka eh ii warqatho sharcigy lahaangshathy.
4. Dawladda si ebedi eh ma ang biyi korto qiib ku mid eh dhulka, badda ii hawatha Soomaaliya.
5. Baarlamaangka waa inii hasaaraa sharci nithaamiyaw ijaarowky ii arrimo kalà o là hariirà dhulka Dawladda, baddy ama hawathy. Si ling xaqiijhiy ing hellisyethy arrimooghaas là hariiraang éyiing haano danta guud ki jerty waa inii :-
 - (a) Hoo arringky éyi heer federaal, waa ing xeer-dejhingty federaalka haky saaraa oggolaashy aringkung hakameyaw.
 - (b) Hoo arringky éyi heer dowl-goboleed, waa ing xeer-dejhingty maamul-goboleedky haky saaraa oggolaashy aringkung hakameyaw.

Qothobky 49 aad – Iniis-nagowky Hantithy

1. Xukuumaddy federaalka o kaalathaasy dowlathoo-goboleed waa inii ang hoolgalaa reed-hang-nagowky hantithy Dawladda oo si sharcidorro eh dad kalà k à haaysathaang.
2. Xukuumadda federaalka yetho kaalathaasy Dowlathoo-goboleed waa inii ye ang guntataa reed-hang-nagowky dhamaang hantithii dadka; hihaatheeng dhul ama hantà kalà oo si sharcidorro eh dad kalà ki haaysathaang.

Qothobky 50 aad – Kheyraadky Dabiicigy ii Deegaangky

1. Kheyraadky dabiicigy ehe dalka sithy macdanty, biyoo, geethoo, daaqa ii ugaarta weybuwa hanty dadwiiny. Baarlamaanka waa inii dihiyaa sharci tilmaamaw habky liingku faa'itheysathaw kheyraadkaas, si ki jerty danty guud.
2. Xukuumadda federaalka wey mudnaang siyaasee ilaaliyowky, keythiyowky ii dhoorowky deegaanky, iyethoo liky ilaaliyaw wal kasto wal ang dhimaw shal-geddiisanaanty noolaga dabiiciga eh ii qaab-dhismeedky degaangky.
3. Dhammaang dadky ku nool Jamhuuriyadda weyba waajib ky ehe ilaaliyowky ii koriyowky deegaanky ii ku qiib-galowky hormariyowky, fulingty, maareeyowky, hanaaneyowky ii dhoorowky kheyraadky dabiicigy eh ii deegaanky.
4. Xukuumadda federaalka ii xukuumatho Dowlathoo-goboleed oo intohowyaalka degaankà wal ang dhimaw saameeyeen waa inii:-
 - (a) Dhagang-gilithaa tillbayaal liky nathiifiyaw wasakta ii heraayky suntà halisty ehe liky shuby dhulka ii biyoo Jamhuuriyadda.
 - (b) Dijhiithaa sharci, qaadaana tillbooyinka mal-ka-maaramaangka ohoo lukuku horseethaw wasak-deethiyowky wasaktaas; taasoo eh heer-jhibing qaanuungky dowligy eh ii ka-xadguthub gôbnimaathy Jamhuuriyadda.
 - (c) Qaadaa tillaabooyinka mal-ka-maaramaang ang eh oo magdhow lukuku qaathaaw haang mas'uulky ku eh ku-duugowky wasaktaas; hi roogeeng Jamhuuriyaddy guthaashe ama meel kalà.

- (d) Qaadaa tillaabooyinka mal-ka-maarmaang ang eh reed-hang-nooleeyowky, reed-ang-dhireeyowky, kor-ang-qaathowky tayatha deegaanky ii ing la'angka horseethy hoolooga ku lug leh waliiba wal ang dhimy koro kheyraadky dabiicigy eh ii deegaanky dalky.

UTUBKY 6AAD-METHELAADKY SHACABKY

Qothobky 51aad-Mabaad'iitha Guud e Methelaady

1. Nithaamka doorashitha waa inii ky dhisinaathy mabaadii'tha ha dareerty:-

- (a) Ka-dhagangky xuquuqthy siyaasatha muwaadhiniinty leyiing weyba ky eddaa qothobky 27aad.
- (b) Inii geeddiso'odky doorashithy nagathy koo futhud, oo xeerarshey, ii qaababshey ii habraa'sheyba la fahamy koro.
- (c) Dadka de'thiyo deerti ed-dhiibashootha doorashatha weyba dhammaatiyo xaq siming ing leyiina inii edsho dhiibathaang.
- (d) Inii dhamang qiibo bulshithy Soomaaliya helang methelaad caadil eh.
- (e) Inii ethedky ed-dhiibatatha siminaathang intii suurtygal eh.
- (f) Inii luku horseethy isku-horkooyky ii olaad-kiyowky, ii
- (g) Ing doorishooyingky haathaang hur ii cadaalad, oo ki dhiyaang:-
 - I. Ed-dhiibasha qarsoothy eh;
 - II. Si ku xur eh rabshathy, haddithaad, musuqmaasuk ii laaluush;
 - III. Si furung, oo lakà maamulà eeh la'aang, dhahdhahadnimà, hufnaang ii qaab li hisaabting leh.

2. Barlamaangka waa inii ha saaraa sharci nithaamiyaw qoboshithy doorashooyinka

qarangky ii Dowlathoo-goboleed. Sharcigaas intii suurtagal eh waa inii xaqiijhiyaa:-

- (a) Ing doorashy kasty ed-dhiibathaalka helang macluamad ky filing o ky saabsang nithaamky doorishithy, habraa'yathy ii iddii yoo doorathaayang;
- (b) Muwaadhing kasty o xaq ang leh ed-dhiibashà waa inii is diiwaang-giliy, reednà edshey dhiibathà, is-horroogsà ii takoor la'aang;

- (c) Qof kastoo ed-dhiibathaw ing awood ang leyi inii edshey ang dhiibithy si waafaqsang lamiirshey, yetho ang jerni ketheed ingy kooyaw dad kalà;
- (d) Musharrixiinty ii axzaabtà siyaasigy ehe ka tartamaaw doorishooyingky waa inii helaang fursathy siming oo cadaalad ky dhising, xilligà liing ololeeyaw doorashithy;
- (e) Ing là xaddithy saameynty lacagtà ky weeldhothy korto natiijithy doorashithy;
- (f) Nithaamky ed-dhiibashathy waa inii haathà koo sehel oho hufang, là hubiy koro, nebedgiliyi leh, lala hisaabtamà koro oo furfuring;
- (g) Waa Inii jiraa nithaam ii hab liky xaqiijhiyi koro xafithaaddy qalabky doorishooyingky, amaamul-humana liingka horseethy koro; ii
- (h) Inii li diyaariyi qaab roong oo liky xalliyyi murumeethà ka dhalathà doorshooyingky.

Qothobky 52 aad – Axzaabtà Siyaasigy eh.

- 1) Xizbi siyaasatheed oo ang diiwaang-geliisanaaynà maha merethà koro musharrax.
- 2) Baarlimaanky waa inii ha saaraa sharcigy diiwaang-gilinty ii diwaang-ku-saarawky axzaabtà siyaasigy. Waa inii li diiwaang-giliyi xizbigii ha buuyi shuruutho Dastuurkung ii halbeegyaalkà kalà oo sharcigy liky husi.
- 3) Weyba reebanà inii li diiwaan-giliyi xizbi siyaasatheed ki dhising heeb-qabiil ii angla-jeeddà iithang.
- 4) Habraa’à diiwaanky liingku saaraw xizbi-siyaasatheed oo jhibiyi Dastuurka, sharciigy ama heer-dhagaameedy waa inii xaqiijiyi ing ciqaabty xzsbigy nogotaa too ang dhikaamaas xad-guthubky dhaganshey ii ing habraa’a nagathy ko cadaalad eh, ki mathabinnaw Dawladda ama xizbi -siyaasitheed kalà ii farageling kalà oo laniing baahanaayny.
- 5) Sharcigy liky dhagaw xizbi’yaalka siyaasaddà waa inii waajib angkà dhikaa axzaabta inii lahaathaang dasaatiir ii hab-rra’yi ki dhising dimuqraaddnnimà ii takoor la’ang, si caathy ehnà hisaabaadsho liing baara koro.

- 6) Sharcigy lakà dhagaw axzaabtà siyaasiga waa inii waajib ingky dhikaa axzaabtaas inii eddaayaang, ilaa xad, taageerooyinkà maaliyatheed iyoo ku helaayang iloo bersho.

Qothobky 53 aad – Heer-dhaganky Guud e axzaabtà Siyaasigy eh

Guddigy doorashithy, usugo là tallathaw hay'athoo ii shaksiyaadky khuseyty, waa inii diyaariyaa heer-dhagangkà guude axzaabtà siyaasiga.

Qothobky 54 aad Heer-Dhaganky Waqtiyaalkà Doorashathy

Guddigy dooryshithy, usugo là tallathaw hay'athoo ii shaksiyaadky khuseyty, waa inii diyaariyaa heer-dhagangkà axzaabtà siyaasiga, musharrixiintà ii warbaahingty, kaasoo nithaamiyaw hab-dhaganky axzaabtà siyaasiga mousimee yoo ki jeraang ololaaga doorashooyinky la qobothaaw, ed-dhiibashathà ii walii ku dombooyobà.

Utubky 7aad- qaabdhismeedky feDeraalkA eHE jamhuuriyaddA.

Qothobky 55 aad-Qaabdhismeedky Jamhuuriyadda.

1. Soomaaliya weybuwaa Jamhuuriyad federaal eh, oo dadka si dimuqraady eh, owood ang leyiing inii mathabinnaanathiyo angky dhagamaang heerarky shal duwung e hay'atho xukuumadda, iyeethoo ling maraaw hay'atho ii habab ang qalamow dhagangsho ii baahithiyo. Weybaa jeree seddy heer oo dowlatheed.
 - (a) Heerky deegaanky oo hay'athoo ii qeyboo bulshithà o nagathaayang aasaasky xukuumadda, waana ku qiibgalaayang suubiyowky golayaalky Dowlathoo hoose oo eh inii li dhisy.
 - (b) Heerky dowlo-goboleed ki dhising nithaam is doorashy ii is-hisaabing sithy ka abtugung Dastuurkung ii dhammaang dastuurathà dowlathoo-goboleed.
 - (c) Heerky Dowladda Qarangka oo Federaalka eh.
2. Weybaa Dastuurkung si ed liky bayaaniyey hay'atho ii nithaamee xukuumadda heerky federaalka ii hay'atho qarangkà.

Qodobky 56-Mabaadi'da Federaalka ee Jamhuuriyadda

1. Heererky shal gediising e xukuumitho madii dhatiyo macaamilaayang ii madii ki gutha-jiraang etheegsigy owoodda sharci-dijhingty ii owootho kalabà, waa inii ilaaliyaang mabaa'dii'thà federaalnimithy; haanaas oo eh:-
 - (a) Heer kastoo xukuumatheed tu' welbe waa inii haaysata taageerath dadwiinaga.
 - (b) Owoodda weyba li siiye heer –xukuumatheedii owooddaas isticmaalshee ii etheegsishee ka nagathaas too si eed wal-ku-ool eh.
 - (c) Hariirky iskaalad ii istageerow lamma-dhiniili oho ang dheheeyi Dowlathoo-goboleed dhatiyo ii Dowlathoo-goboleed ii Dawladda-federaalka, si ang jery baaqina ang haatha ruuxa midnimathy qarang.
 - (d) Qiib kasty o Jamhuuriyadda ki tirsing inii helaa etheegyithy haang kalà helaayang ii saas oo kala wal-qobod xukuumatheed o wal-tar leh.
 - (e) Kheyraadka dalka oo si cadaalad eh liing qiibsithy.
 - (f) Dakhli aruuriyow oo ling suubiyow heererky ingy wal-tar bathang, ii
 - (g) Khilaafaadky o watha-hathal ii heliis-deerow liky xalliyyi.

Qodobky 57-Hiriirky ing dheheeyi Heererky Dawladi

1. Dowlío-goboleed kasty waa inii yee ang dethaalgalla oo hariir iskaashy li weeldhaty xukuumatho isky heerky eying ii haang heerarky kalà ehba. Xukuumad kasy inii ye ilaaliduw xuduudda owoodiye ii owoodda haang kaleby. Waana inii iye dhiiri-giliithuw oo hariir saaxibtinimy li weeldhithaang xukuumatho ku jery meelo kalà e dalky ii dadwiinashooba. Xukuumad kasty inii hubiithuw oo xukuumatho kalà ki wargiliithy siyaasitho ama hoolo ki dareerang guthaanta xuduudyaashe; haanaas oo luku yaaba inii meelo kale saameyng ki weeldhathy koraang. Meeli suurtagal ehny waa inii xukuumatho si wathajir angka dhagangeliyaan mashruuc-wathaag ah.
2. Si ling heli hiriir iskaashy, inii sharcigy jitheeyi kulung sanatheed inisky kooyayang mathiihtha fulingty ee Dowlathoo-goboleed ii Dawladda-federaalka, si ing ku haajothang, waany inisky toosiyaan qorshigy Dowlatho-goboleed ii arrimo li hariiry taageerithy Dowlatho-goboleed.

3. Weyba waajib ehe inii li qobothy kulungky mas'uuliyiinta heer Dowlatho-goboleed, maddii liky hathalow arrimo saameeyaw walku bathang hal Dowlatho-goboleed sithy biyo, beero, caafimaadky ii wal-barashithy.
4. Dowlatho-goboleed weybaa heliis qoraal eh la gala koraan Dawladda Federaalka, iyoo dhatiyoona isla gala koraang helliis. Haato, heliisyathaas maleh awood sharci, walibase liingli jeethee inii nagathaang hab iskaashy.

Qothobky 58 aad- Watha-xaajoodyaalkà Dowliga eh

1. Iyeethoo dareeng iskaashy liky shaqeeyaw, Dawladda Federaalka waa inii Dowladood-goboleed kula tallitaa wathy-xaajoodyithy li hariiry kaalmathy dibiddy, gana'asigy ama arrimy kalà oo muhiimka oho heliisyithy dowligy ki saabsang.
2. Hoo wathy-xaajoodky si gaar eh ing saameyaw danoo gaarky ehe Dowladood-goboleed, Dawladda Federaalka, hoo suurtygal éty inii iye ki darty ergathy watha-xaajoodky galaasa wakiili ku dareery dowlo-goboleedkaas.
3. Madii li galaw wathyxaajoodyithy, Dawladda Federaalka e inii tixgiliithy inii iyee éty wakiil liky aaminy danoo Dowlathoo-goboleed.

Qothobky 59aad –Dawladda hoose ii Maamulky

1. Dawladda federaalka weyba hasaarase sharci liki dhisaw qaabky ii mabaadiitha hegaaw dowlatho hoose.
2. Dowlo-goboleed kasty waa inii iye abuurty nithaam dowlad hoose oo waafaqsang hab-rra' ii sharci dejingty federaalka.
3. Xukuumatho dowlathe-goboleed waa inii iyoo siiyang dowlathoo hoose awood iyoo ki maamulaayang sharcigy ii barnaamajyaalsho, si waafaqsang mabda'a (b) oo mabaadii'thy federaalka eh oo ki husung qothobky 56 (1). Hoolo walibaa liky wareejhiyeey goloyaalky Dawlathooga hoose si tartiib-tartiib eh oo li dareerty habky korowky kartithiyo. Sharci federaal eh ya ha jeethiyi doony qaab-dhismeed oo

xukuumad kastoo Dowlo-goboleed ang guddoonsatha korto wareejhing kasty oo dowlid hoose xil ki wareejhiyaasy.

4. Xukuumadda federaalka ii Dowlatho-goboleed wey mas'uuliyad maamul sharci i barnaamijyaalba ki wareejhii koraang hay'athoo ii bulshooyingky deegaangky.
5. Hay'athoo ii bulshooyingky deegaangky waa inii liki dhiirigiliyaa, laka taageeraa, luku kaalmeeyaa sithii ing guthuthy lahaayeeng waajibaadky Destuurk ang xilsaari siiba arrimoo la hariira dimuqraadiyathy ii xuquuqthy eetheneegy.

Qothobky 60 aad-Qiibingty Owootho

1. Dawladda federaalka, iyeethoo angka bahaana soothimoo Dastuurka tilmaami, weybaa owood ang letaa inii Jamhuuriyidda Soomaaliya oo dhong ang suubithy ii inii ang maamulà sharciyaal ky saabsang maamul-wanaagga.
2. Dowlo-goboleed kasty iyeethoo angka bahaana soothimoo Dastuurka tilmaami, weybaa owood ang letaa inii Dawlo-goboleedda ang dejhiithà ii inii ang maamulà sharciyaal ky saabsang maamul-wanaagga.
3. Owootho weybaa liky qiibiyey Jadwalky 2aad oo ki koobang tahaalka liky muujihiyi owootho li siiyi xukuumadda federaalka, owoothoo liky siiyi xukuumatho dowlatho-goboleed ama owoothoo lamaathiyoo, xukuumadda federaalka ii xukuumadda goboleedaba, liing siyi inii withaaggaang.
4. Tahaalkà owootho ang gaarky ehe Dowladda Federaaliga, weyley isticmaala koree xukuumadda federaalka sheleethiyee, hoo iyee idd kalà ankà wakiilany si waafaqsang qothobkà kalà oo utubkung ky husang.
5. Tahaalkà owootho ang gaarky eh dowlo-goboleed, weyley isticmaala koree xukuumà-goboleed sheleethiyee, hoo iyee idd kalà ankà wakiilan, si waafaqsang qothobkà kalà oo utubkung ky husang.
6. Tahaalkà owootho federaalka oo withaaga eh weyba ki wathà dhagama kore xukuumadda Dawladda federaalka ii xukuumadda dowlo-goboleedda. Hoo khilaaf ku dhah dhalathy sharci Dawladda Federaalig ii sharci Dowlo-goboleed arring kasty oo tahaalkng kà mid eh, weybaa awood weeldhathey sharcigy federaalka.

7. Tahaalka owootho Dowlatho-goboleed oo withaagga eh, lamaatha xukuumathood ee federaalka ii tang goboleedkaba isticmaala koraang. Hoo khilaaf ku dhah dhalathy sharci Dawladda Federaalig ii sharci Dowlo-goboleed arring kasty oo tahaalkng ka mid eh, weybaa awood weeldhathey sharcigy Dowlo-goboleedka.
8. Dawladda Federaalka weybaa sharci ang dejhiny kortee arring kasty oo lingka husny tahaalka Jadwalka 2aad.

Qothobky 61aad-Dhagang-gelinta Owootho Withaaga eh ii Sharci-dejhinta Xukuumathoga Dowlatho-gobolee

1. Si ling tigaathiy ruuxa is-kaaladka Dowlo-goboleedii fathaasy inii sharci hakà saarta mowduuc kasty oo ka mid eh tahaalka owootho federaalkaoo withaagga eh ama tahaalka owootho Dowlatho-gobolee oo withaagga eh, waa inii la tallataa xukuumadda Dawladda Federaalka.
2. Waa ing laha saaraa sharci federaali eh oo ang gundhigaaw habraa'a Dowlatho-gobolee lakà xilqaamaw mas'uuliyad yoo ky suubiy koraang sharci kasty oo ky saabsang arrimo hoos kooyaw tahaalka owootho withaagga ehe Dowlatho-gobolee. Habraa'a namuungkaas eh waa inii ky lug weeldhathaa qiimeeng laka qaddariyaw owootho dowlatho-gobolee ku qaathy koraang mas'uuliyady ha saarawky ii maamulowky sharcigy mowduucaayaalkaas ky saabsing.

Qothobky 62 aad- Wakiilashata Owootho

1. Xukuumà kasty ang wakiilatha kortà xukuuma kalà owood maamul ii mas'uuliyibà ama xukuumà kalà oo heer kastà eh, iyeethoo rahaasy habraa'e watha-talathowokà la weeldhthaasy xukuumathaas ama xukuumathoogaas.
2. Dawladda federaalka wey hal xukuuma-goboleed ama ku bathaning ang hilsaarithy kortee owood sharci angky suubithi moduuc ku mid eh owooddy sharci-dijhinta Dawladda Federaalka oo lingky dang leyi arring gaar eh ama arring guud.

3. Haddii xukuumathà federaalka, si waaqsang qothobkung, iyee sharci suubis ama sharci maamulow ang hilsaarty xukuumà-goboleedo too eh ama dhammaang xukuumthoo-gobolee, waa inii xukuumathoo dawladee goboleed ang xaqqijhithaa inii la siiyaa dhagaalaka malk-maaramaang oho ky filang hoolla xukuumadda federaalka ang hilsaarati, ama liing ogolaathaa awood yee dhagaalagaas ky aruursatà.
4. Haddii liing baahathy, Xukuumathà Dawladda Federaalka kulu nogothy korty owoothoo iyee si qothobkung waafaqsang idd kalà angky hilsaaraty, Iyeetho waqti habboong ky ogeysiyaasà xukuumadda dowlo-goboleedda ama xukuumatho dowlathoo gobolee arrinta khuseeyaasy.
5. Xukuuma dawlo-goboleed too ama ky bathang wey xukuumatha federaalka warsatha koraanà inii qaathaang mas'uuliyad eh inii sharci hakà saaraang arring gaar eh oo ka mid eh owootho xukuumatho dowlathooga-gobolee.

Qothobky 63 aad-arrimo maaliyaddy

1. Awoody ka saabsang dakhli-àruurinta heerarky shal duwun oo xukuumatho weyba ky husunyiiny Jadwalky 2aad.
2. Xukuumadda federaalka waliba awood ing letaa inii iye ky biithy kharaj ujeedy kasty oo sharcigy waafaqsing, too owooddà sharci-dejhingtiyee siithi ley hatii ii ang haneeba.
3. Mabaadii'thy ii habky liing qiibiyaw hantithy maaliyatheed e heerarky shal gediisinee xukuumathoo weybaa si ed linky bayaaniyey Utubky 14aad.

Qothobky 64 aad-Maxkamathoo

1. Jamhuuriyadda Soomaaliya weyba ku jeree nithaam garsoor mitheysing, sithy ki ed Utubky 10-aad.
2. Faqradda (1) ka sokow, khilaafaadky liky baliyaw habka xeer-dhaqameedky wal kà sii dhagamy koro hoo angky horkooyaany sharee'ady ama Dastuurka dalka.

Qothobky 65aad-Shaqaalaga Dawladda Rayadky eh

1. Xukuumadda federaalka ii xukuumathoo dowlatho-gobolee shaqaaleytha koraang hol-wetheengsho.
2. Guddiggà Shaqaalaga Rayidky ehe Dawladda federaalkaa dihiyee mabaadii'dà, xeererky ii shuruutho shaqa-qoristà ii arrimoo kalà e khuseeyi shaqathà Dawladda ee heer-kastà.
3. Xukuumadda Qaranka ii xukuumathoo-gobolee weyba iskà kaalathaayaanà hoolgilintà shaqaalaga lakà hoolgeliyaw heeraka shal geddiisang, si liing xaqiijhiy ing khubaratha ii khibrathoogaba la'angkà-watha- faa'itheysithy hadba meellii liinkà baahanyi midnimaatha Qarankana Iliing hormariyi.

Qothobky 66 aad-Owoothoo Hukuumyddy Federaalka oo Taageraw Nithaamky Federaalka

1. Hoo xukumà dowlo-goboleed guthuthy koro waayà hillashee ama iye ang muuqata inii maamul-humà maaliyatheed ka jertà, mas'uuliyaddy koowaad e xukumatha federaalka weybuwa inii xukumathà dowlo-goboleedda kà taageerty sithy iye wal ung ku qobothy faddy dembiilayaalk, ii inii suubithi wal-alla walii liing baaahanyi oo xukumathà dowlo-goboleedda ang suurtageliyaw inii xilalshee sinwal-ka-ool eh ang guthuty.
2. Hoo dowlo-goboleed si hariir eh ama bathanaaba ang guthuthy waaytà waajibaad destuurkung ang xilsaari ama sharci kalà oo federaali eh, xukumadda federaalka inii iye qaaduw talaabooying liingka maarmaanà meelmariintà fulinty waajibaadkaas. Talooboyingkaas waliibaa ku mid aha ing xukumadda federaalka towjiij ky farty xukumadda dowlo-goboleedda dhaqang-geliyoowky wajibaadka iye gabty, towjihana ang hoggaansantà. Haato, awaamiirty namuunkung eh mal dhiibà koro hoo nus-kà-nus hubnoo Golaga Wakiilathà Dowlathoo-gobolee ang oggolaana, oo ankà jernà Wakiilathà Dowlo-goboleedda waajibaadky Destuurigy eh oo guthuthy waayty.

Qothobky 67 aad-Magaala-mathiithy Qarangka

Fiirà gaar eh: Maqaamky Muqdishow (Hamar), oo eh magaala-mathiithy Jumhuuriyadda weybaa liing habeeye koree seddiithà qaab-mereshà oo hoostung ka abtugung tootiyo.

Go'aangky angky dombooyi weybaa l à deerà doone maddii talooyinkà ii fiiryooyinky dadwiinaga la ha aruuriyi muddathà latalladka dawiiinga liingky talagali ka bacdi.

MERESHATHY 1aad (Caasimà ky dhah-taalà Dawlo-goboleed)

1. Magaalà-mathiithà fetheraarlka weyba haathaasee magaalà ki dhataali dowlo-goboleed.
2. Xukuumathà dowlo-goboleedky oo ky dhataali magaalà-mathiithà, iyetho là tallaty Dawladda-Federaalka waa inii iye hasaarty sharci gaar eh o eddaayaw maqaamky Caasimidy Federaalka.
3. Golaga maamulky ee Caasimidy Federaalka ii xukuumadda Federaalka waa inii ilaaliyang mabaadii'thy hiriirky iskaaladkà oo Datuurkung dhigaw, waani inii si gaar eh ingky helliyaang arrimo la hariirà anshuuro, xeerarky kalà oo nithaamiyaw dhismooyinkà ii dhululkà eh milkiyathà xukuumathà Dowladda Federaalka ama iyeeba deggengtà oo ky dhah-yaalà magaalà-mathiithà.

MERESHATHY 2aad (Degmathà Caasimatha Federaalka)

1. Muqdishow weybaa nagathaase degmy magaalà-mathy ang eh Dawladda Federaalka.
2. Degmy magaalà mathiithà Federaalka muku mid nagathy korty qiib ku mid eh Dowlo-goboleed.
3. Xukuumatha Federaalka waa inii ha saarty sharci gaar eh o nithaamiyaw is-hukungkà dimuqraadhigà oho liky maamulaw degmithy magaalà-mathiithà federaalka.
4. Sharci gy doorishooyingky federaalka inii siiyuw muwaadhiniingty degeng magaalà-mathiithà xaq iyoo ky doorathy koraang wakiilà ky mathelaaw Golaga shacabigà, waanà inii xaqaas methalaadda ang ki waayny deggenaanshithy iyoo degejhiing magaalà- mathiithà Dawladda federaalka dartiyee.
5. Dadwiinagy degeng magaalà-mathiithà federaalka makà weeldhathaayang wakiilà ka methelaw Golaga Walkiilathy Dowlatho-gobolee.

6. Xukuumathà federaalka weyba awood ang letaa inii dihiithy shuruuc ii inii maamul dhamaang arrimo magaalà-mathiithà iyeetho etheegsithaasy tahaalka owootho li siiy magaalà-mathiithà federaalka, haatoo weyba owoothooshe ang hilsaarathy korte Golaga-Maamulka Caasimithy federaalka, si taas là too eh yaa ang ky hilsaarathy kortà Dowlotho-gobolee sithy ki ed qothobky 62 aad ee Utubkung.
7. Golagaga maamulky magaalà-mathiithà Federaalka ii xukuumatha federaalka inii iyoo dhoorang mabaadii'thy hariirky iskaaladka oo ku husung Destuurkung.

MERESHITHY 3aad (Caasimithy eh Dowlo-Goboleed)

1. Magaalà-mathiithà federaalka weyba nagathaase Dowlatho-goboleed.
2. Magaalà-mathiithà federaalka makà darsama kortà gobol kalà, maana nagathy kortà qiib Dowlo-goboleed kalà ky dhul-billeersatà.
3. Gologa maamulky magaalà-mathiithà Federaalka ii xukuumatha federaalka inii iyoo dhoorang mabaadii'thy hariirky iskaaladka oo ku husung Destuurkung. Waa inii si gaar eh angky helliyaang arrimo la hariiry anshuuro, ii xeerky kalà oo nithaamiyaw dhismooyinkà ii dhululkà eh milkiyathà xukuumathà Dowladda Federaalka ama iyeeba deggengtà oo ky dhah-yaalà magaalà-mathiithà.

Qothobky 68aad-Hallinta Khilaafaadky

1. Mabda'a ahaang khilaafaadky ang dhahooyi dawlathoo waa ing liky xaliyaa hab-tartiireed, wathahaajood ii dhah-dhahaathing ky dhising iskaalathow ii niyi-samaad.
2. Xukuumatha federaalka ii xukuumatho dowlatho-goboleebà wey kà helliyi koraana inii dhisithaang Guddiyaal Gaar oho kà xalliy kana dhah-dhahaathiy khilaafaadky ang dhohooy dowlatho.
3. Hoo khilifaadky dawlathoo ang dhohooy dhah-dhahaathing ii ka-watha-xaajood lakà xalliy waayi, Maxkamadda Dastuurkaa angkà domboytii go'aang ky deeraasy.

Qothobky 69aad-Soothimo Dowlatho-Gobolee

1. Guddiga Sumutheenta Soothimoo Goboleetha waa xalliy doona dhammaang khilaafaadky hatta ku jira ii khilaafaadka mustalqalka ka dhalatha doona summutheynta soohdimee goboleetha oo sharciga nithaamiyi doona.
2. Guddiga Matha-binnaaw e Dastuurka ii Arrimo Federaalka ama hay'addii beddelà, iyogoo là tallathaaw gudiyaalky kalee qarang yaa ky kaalmeey doono Dawladda federaalka go'aamintya tirithy ingy yar ii tang inky bathang oo ky koobamaayaang dowlath-gobolee la suubiyaw.
3. Soothimee dowlathoo-goboleed weyba ki salaysanaathy donaanà soothimà-maamuleedkii goboleethy ha jery ilaa 1990, taasoo eh degaalky ahligy ka hor.
4. Lamma gobol ama ku bathangaa ki mithoowo koraang oo dawlo-goboleed suubsathaang iyogoo go'aanshoo hur ang eh.

Qothobky 70 aad-Suubiyawky Dowlatho-goboleed Usub

1. Ingy yaraang lamma gobol hatta jiraan ama ku bathang oo si hur eh iniisky kooyi yaa suubsathy koro dowlo-goboleed usub.
2. Dowlo-goboleed usubaa suubthà koraang dowlathoo-goboleed hor ing jery hoo tiry ma'aquul eh oo hal ama ku bathang oo ku mid eh dowlatho-goboleethaas hoo fathaayang inii suubsithang dowlo-goboleed, hooba dhisowka dowlo-goboleedda étty tubta shaleethiye o ky deery koraang dantiyoo guud oo withaagga eh.
3. Dowlatho-goboleed usub waliba suubiyi koree hoo aringtaas taagersijhiing aqlibiyidy dadky:
 - (a) Deggeng gobolee suubsathaw dowlo-goboleedda usub;
 - (b) Deggeng goboleetha saameeyaasa suubiskà dowlo-goboleedda usub;
 - (c) Hoo suubiyawky dowlo-goboleedaas usub angku hor kooyaany danta qaranka;ii
 - (d) Hoo wal anag dhimaana midnimithy qaranky federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

4. Suubiyawky dawlo-goboleed usub mal ogolaathy koro hoo owood iniiing lahayna fulinty waajibaadky ii mas'uuliyatho luku fathaw dowlo-goboleed ki tirsing federaalka, oo ki mid eyiing dhoorowky xuquuqthy aasaasigy eh e muwaadhiniingty ki nool dowlo-goboleedda, ii hoo ang lahaayny iskifilnaangshy-dhaqaale ii qobshatha etheegyithy aasaasigy ehe bulshatha. Baarlamaanka waa inii meelmariyaa sharci nithaamiyay dhisidda dowlo-goboleed usub.
5. Hoo lamma dowlo-goboleed ama ku bathang deres eh ki helliyaang inii walk u beddelaang soothimo iyoo withaagaang, waa inii Golaga Shacbiga ansixiyaa hoo seddy meelood lamma ku mid eh Golagayaalky Degmooyingky Dowlathoogung-gobolee oggolaathaang xuduud beddeloowky.

Qothobky 71aad-Oggolaanshithy haki Darsamoowky Jamhuuriyadda

1. Hannaangka habraa'a federaaleynta lahang maraw watha-hathal lakà haajoothaw ii iskaaslad
2. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wey ha dhowaayase maamulathy jirà oo fathaw inii hakà darsamaang federaalka, weybaana dhiirigiliyaase haky darsamow qaab nebetheed liing maraaw.

utubky 8aad-Baarlamaanka federaalka

Qothobky 72aad-Dhismigy Baarlamaanka

Baarlamangky Federaalka Soomaaliya weybaa ku koobanaathy doone lamma gola: Golaga Shacabkà ii gology Wakiilatha Dowlathoo-gobolee.

Qothobky 73 aad Hilky Golaga Shacabkà

Hilky Golaga shacabkà weywaa inii mathalà shacabkà Soomaaliyeed si iyoo ingku qiib-qaathathaang heer-dijhinty ii oggolaanshithy miisaaniyiddy qaranky ii dhamaang kharajyathy xukuumadda, kormeerowky hooloo Dawladda i guthushoothery dhammaang hilalky kalà o Dastuurka ang hilsaary.

Qothobky 74 aad Hilky Golaga Wakiilatha dowlathoo-gobolee

Golaga wakiilatha dowlathoo-gobolee weyba hil gaar eh ku saarijhaa mathalaady dowlathoo-gobolee Soomaaliya ii ilaalingty nithaamky federaalka. Waliiba ku qiib-galaayaany heer-dejhinta ii ogolaashithy misaaniyaddy qarangky. Saas oo kalà, waeybaa kaloo kuqiib- qaathathaayaana kormeerky hoolo xukuumadda ii hoolo kalà Dastuurka ang hilsaari.

Qothobky 75 aad- Hubing-nimaathy Golaga Shacbiga

1. Tirithy hubno golaha shacabkà weybaa nagathaayana 200 ilaa 300 hubnood oo dadwiinaga hakà doorathaayang si waafaqsan shuruuchal akà meel mariyi si waafaqsing qothobky 52 (2).
2. Taariikdy doorishooyingky Golaga Shacabkà lo qobothaw weybaa go'aamiyee Guddigà Doorishithy, ku reed maddii usu la tallathatha Mathawiinagà Jumhuuriyadda ii Afhayeengky Golaga Shacabkà, waana inii liki qobothy intii dhamaane lihdinky gee anky dombooyang jerowky Golaga shacabkà.

Qothobky 76 aad-Hubung-nimaathy Golaga Wakiilatha Dowlathoo-gobolee

Hubnooga Golaga Wakiilatha Dowlathoo-gobolee weyba ki koobimeeye ergà 10 hubnood oo ku shal kooyaw Dawlo-goboleed kasty. Hal hubung oo ku mid eh ergà walba waa ing ahaathaa mathagà xukuumaddy Dowlo-goboleedy ama qof usu mathalow, 9 kà hubnood kalnà weybaa ha maga'aawey Barlamaanka Dowlo-goboleedy oo haku meraaw hubny ku basang oo angkà mid haynà Baarlamaangka Dowlo-goboleedy.

Qothobky 77 aad Ku-midnagathoowky ii Waayawky Hubingnimatha

1. Langny hubung muku nagathy koro lamaathy galo Barlamaangky hoo ang haynà qof ang diiwaanggallang inii usu éyi doorathe, Soomaali eh oo de'ethisny ku wiingty 25 siny.
2. Langny hubung muku nagathy koro lamaathy Golaga Barlamaangky hoo:
 - (a) Si sharci waafaqsang liig eddaayi ing dhimirshy ing dhomaaynà;
 - (b) Si sharci waafaqsang liig eddaayi inii usu musalaf éyi;
 - (c) Liky heli dimby la hariiry doorishooyingky 10 ky siny ingki dombooyti dhatiyo;
 - (d) Liky heli dimby la hiriiry musuq-maasuq ii ki tagrifalaw owood-hafiis ciqaabtisny ku batangty 25 siny,ku reed madi li dhaqang-gilii destuurkung; ama

(e) Inii habbis ki jery.

Qothobky 78aad-Muddithy Hilky Hubno Baarlamaanka

1. Hoo xaaladdy ku husung faqradda (2) ang dhiineebà, qof Golaga Shacabkà hubung ku eh weyba hilky haayeey ilaa hubno Baarlamaang usub lakà dhaariyaw, oo doorishy guud oo highti reedshee.
2. Angka hayna faqradda (1), hubung Golaga Shacabkà ku mid eh weyba hubing-nimaathà ky waay korte hoo:
 - (a) Istiqaali jeeyi;
 - (b) Hubung-nimaathà ki waa sithy ky husung qothobkà qothbkung kà koreey; ama
 - (c) Liing doorithy ama liing magi'aawi hafiis hoolis ing sheenaw isdiidmà hileed angl à dareerà korny hubingnimaathà Barlamaanky.
3. Hubung ku mid eh Golaga Wakiilatha Dowlatho-goboleed wey hilky ki waayi kore hoo:
 - (a) Hubung-nimaathà ku waay sithy ku husung qothobky 77-aad;
 - (b) Hilky lungku qaathy si waafaqsing Dastuurka Dowlo-goboleedda; ama
 - (c) Istiqaali sheena.

Qothobky 79 aad Hilky Hubno

1. Hubung kasty oo ku mid eh lammaathy Golaga Barlamaangky hoolgalkà ki hilguthathaw weyba ang hoggasanaathee sitha ang feyle oo ky jerty danta qaranka guud ahaang.
2. Hubing kasty o ku mid eh Golaga shacabigy eh oo mathelaasà goob-dorathaal xil gaar ehaa ka saarang inii methelaa dhammaang dadka goodorathaalkaas iyeethoo anag fiiriyaang fikri-siyaasatheedka iyoo hariiriyaayaang.

3. Hubing kasty o ku mid e Golaga Wakiilatha Dowlatho-goboleed wey hil gaar eh ku saaranyaa mathalaaddy danoo dowlo-goboleedda yee mathelaasà ii inii ilaalithi nithaamky federaalka, haatoo webaa ky shaqeeyaasee ruux ii dareeng isteegaar-federaalnimy eh.

Qothobky 80 aad – Afhayeengky ii Ki-higeengky lammatha Golo

1. Doorashithy guud ku reed, Gola kasty fidhishey kowaad waa inii hubnooshey kà dhah-doorathy Afhayeeng ii Afhayeen-kà-higeeng. Qofkà angkà de'wiinoo Golaga hubung ke eh oo goobrooge ehaa guddoomiye doorashoothung.
2. Hoo dhiithy xaalad Afhayeengky ii Kà-Higeengk-Afhayeenkabà goobroogayaal ang ahaathà kornà, Golaga weybaa xubnaashey kà dhah doorathee hubintoo si ku-meel-deer eh ang shir-gudoomithy.
3. Afhayeenky ma haaya koro ama waa inii ka tanaasulaa hil-xizbi-siyaasadeed kastoo hor hang haayi, waana inii nagathaa qof si athak oo dhah-dhahaadnimy eh ka guthathaw hilalshey ama ka guthathaasa hilalalshy.
4. Afhayeengky ii ki-higeensheybà weybaa hilky liing ku qaathy koree ed-dhiibashy seddy meelood lamma meel e hubno Golaga.

Qothobky 81aad-Muddathy Hilka

1. Muddathy hilky Golaga Shacbiga weywa 5 siny luku bilaawo fidhigy kowaad ee Golaga, oo eh doorishoothy guud reedshey, hoo Golaga lingky shal dirny sithy ku husung Qothobky 82-aad.
2. Golaga wakiilithy dowlatho-goboleed Golà roogty eh wu. [Muddath hilshey wal go'aamiy doony].

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Qothobky 82aad-Fidhiyithy

1. Golaga Shacbiga usub oo laha doorithy waa inii fidhishey koowaad qobsithy 30 bere guthangtiyo, taasoo eh maddii natijathy doorishooyinky guud liky dhawaaqà

ku reed. Taariikdy ii waqtigà fidihiy li qobothaw weyba cayimee Guddigà doorishithy.

2. Baarlamaanka sinidkiibà wey weeldhitheye lamma kolfidhy oo shal bilaawathaw billi April ii billi Oktoobar, kolfidhi kastana waa inii Baarlamaanka fidhi weeldhathaa ang yaraang [tiritha maalmoo wal go'aamiy doony] bere kolfidhiigby.
3. Guddoong Baarlamaani eh waa liky go'aamiye xaddithaady taariikhdhthy ii amineetha fidhiyaalkà Gola kasty.
4. Maddii kolfidhiyaalkà Baarlaamka hirinyiing, kolfidhy caathy ang haayny weyba iniinky weery koree Mathawiinaga [Nithaamky Baarlamaanigy - usugo fuliyaw codsiàg Golaga Wasiiritha) ama Afhayeengky. Kolfidhy caady ang haayny waa inii liing weeraa hadii 20% hubnooga Golaga Shacbiga codsi abtugaal eh haka dhalbathaang ama nus-ku-nus ergooyingky dowlatho-goboleed ka dhalbathaang Golaga Wakiilatha Dolotho-goboleed.

Qothobky 83aad-Shal-Dirowky Golga Shacabigà

Golaga Shacabkà Mal shal diry koro mathallà sharcidihnta 5 siny dhammadshee ku hor [angka hayny nithaamky Baarlamaanigy eh] hoo usu owoothy waay inii Golaga Wasiiritha ii Barnaamijky Dowladda ka ansihy sithy ku husung Qothobky 106 (3).

Qothobky 84 aad-Heerar-hoosaadhee

1. Gola kasty waa inii suubsithà heerar-hoosdheethis, oo hubnaashee dow ang siyaw ku qiibgal si buuty ang dhamaytirang ii ku-qiibgalky dadwiinagbà.
2. Fadhiyaalky lamaathy Gola i guddiyaalshoobà waa inii ing furanaathaang dhugungsadky dadwiinagy iyeetho maagkà lakà haay mabaadi'thy guud ee furfurunaanty xukungkà Dawladda, hoo Afayeengky sisaas ku gediisang ang amarneebà.

Qothobky 85aad Tirithy Shirirky ku qobsomayaang (Quorum)

1. Fidihiy laky furaw Kolfadhiga Baarlamaanka weybaa ka ansaxee hoo seddy mellood lamma meel hubnoo lamaathy Golobà ang goobroog éyiig.

2. Gologa Shacabka wey ley hoolgalshey waddatha koree hoo seddy dhigood hal dhig hubnooshey goobroog éyiig.
3. Golaga Wakiilatha Dowlatho-goboleed wey ley hoolgalshey waddatha koree maddii seddy dhigood hal-dhig Dowlathoo-goboleed ang goobroog éyiig oo ang yaraang Dowlo-goboleed walbanà hal qof ku dareera ang fidhiy.
4. Gologa Shacabka webaa sharci ang etheey koree maddii nus-ku-nus hubnaashey ang gooroog éyiig.
5. Golaga Walkiilathy weybaa sharcigy ang etheey koree maddii ang yaraang min hal qof oo ku dareera nus-ku-nus Dowlathoo-goboleed Golaga hubung ka eh roogaang oo ang yaraang nus-nus dadka wakiilatha ehna ang goobroog éyiig.

Qothobky 86 aad-Go'aang Deerawky

1. Hoo Dastuurka si kalà iniing tilmaangny, Gologa Shacabka weyba go'aama ka deeree aqlabiyithy hubnooshey goobroogga oho etheeyaw.
2. Hoo si kalà Dastuurka si kalà iniing tilmaangny, Golaga Dowlatho-goboleed weyba go'aama ka deeree aqlabiyithy hubnooshey goobroogga oho etheeyaw, Maddii ed-dhiisha go'aan laky deeraw Golaga Dawlathee goboleed ergthà Dowlo-goboleed kastabà ed koo eh ley wathar haang ang latta.

Qothobky 87aad-Habraa'a Sharci-dejhinta Baarlamaanka

1. Hindisy sharci oo saameeyaw Dowlatho-goboleed dhammaantiyo ama bersho ka mid eh ama nithaam-xukumatheedka federaaliga wey la hor-jeey koree lammatha Golo Baarlamaanka kubà kii là fathà.
2. Hindisy Sharci kastoo kalà waa inii ly hor-jeeyi Gologa Shacabka.
3. Hindisy Sharci weybaa Golaga Shacbiga hang jeediy koree Xukuumatha, ama 10 hubnood ka mid eh Golaga Shacabka ama angky yaraang 10.000 doorathayaal eh.
4. Golaga Dowlatho-goboleed weyba Hindisy Sharci kastà hor-sheena koree Xukuumathà ama ergathà Dowlo-goboleed kastà.

5. Hindisy Sharci kastà oo liingky baahanyi kharaj guud ama saameeyaw anshuuroo Xukuumathà sheleethiye ley ha jeethiy korte.
6. Baarlamaanka lammaathiis Golabà sharci kastii ly horjeey korà.
7. Hindisy sharci oo saameeyaw Dowlatho-goboleed dhammaantiyo ama bersho ama nithaam xukuumatheedka federaaliga waa inii lammatha Golaba ansixiyaang si sharci ang nogothà. Maddii Golaga Hindisaaga horta la hor-jeeyi ansixiy ku reed waa inii liing gudbiyaa Golaaga kala.
8. Xeer-hoosaadky lamaathy Gola waa inii heeriya in ly dhisy Guddi Dhadhahaading oo isky deyaaw inii wathar-ogolaal lakà deera sharcigii lammatha Golo isky khilaafaang.
9. Hindisy sharci ang saameeyaany Dowlatho-goboleed dhammaantiyo ama bersho ama nithaam-xukuumatheed federaaliga maddii Golaga Shacabka ansixiyi ku reed waa inii liing gudbiya Golaga Wakiilatha Dowlatho-goboleed. Hoo Golaga Wakiilatha ansixiy waay ama usugoo wal-ka-beddel ku suubiye ka ansixiyi , oo lammaathà Golenà ka helliyi waayaang, Golaga Shacbiga waa inii go'aan ka deera inii Hindisaga Sharcigaas sithii Golagaas ka ansixiyi angka gudbiyaa oggolaadka Mathawiinaga, ama inii dhiny iska dhigaa si mustaqbalka liingky watha hathala ama ing Hindisigaas sharci sithiisbà iniiskà leherà.

***Qothobky 88aad-Oggolaashatha Sharci ii Suurtgalnimaathy Reed-hangkanagawky
Baarlamaanka ama Maxkamatha Dastuurka***

1. Hindisy Sharci weyba sharci nogothee madii Baarlamaanka ansihiy, Mathiwiinagana oggolaatha, ku reedna lahaky saari Faafinty Rasmigy.
2. Mathawiinaga [Nithaamky Baalamaanigy eh usugoo fuliyaw dhalbashatha Xukuumatha], weyba Baarlamaanka reed hangky naga koree Hindisy Sharci oo habraa'ii saxtha haayi lahang mariiny awshee. Hoo Baarlamaanka reed hangky naga Mathawiinaga usoo habraa'ii angky sii nagana ama marlamaad Hidisaga Sharciga ansihiy Mathawiinaga waa inii oggolaathaa.

3. Mathawiinaga [Nithaamky Baalamaanigy eh usugoo fuliyaw dhalabka Ra'iisul-Wasaaragy], weybaa weydiisithy koree Baarlamaanka inii fiirà dambà angky nagathà Hindisy Sharci oo iyoo horà hang ansihyeeng, iyeetho sabab linky dhikaaw ing sharcigaas nuhurshey ang haboonayne. Hoo Baarlamaanka oo mar lamaad seddy dhigood lamma dhig oo Gola kastabà leh ky ansixiyi oo reednà hangky nagaaang inii Mathawiinaga saxiihà, Mathawiinaga waa inii saxiihaa.
4. Mathawiinaga, ama 10 hubnood o ku mid eh Golaga Shacabkà, hal Ergà ama ku bathang hubnooga Golaga Wakiilatha Dowlotho-goboleed ama Golaga Wasiirathy ya horjeeye korà Maxkamatha Dastuurigy Hindisy Sharci oo Baarlamaanka ansixiyi, si iyee go'aang angky deertà dastuurnimatha nuhurkà Hidisaga Shacigy ama habra'a oggolaashathiis liing maàri.
5. Mathawiinaga hoo saxiiha waay ama diithy inii sahihy Hindisy Sharci oo Baarlamaanka ansixiyi, usu oo wal sharci ehiniing haysany, Hindisigy Sharcigy weybaa si aaly eh sharci ang nagathee gee 15-aad lakà bilaawa taariikhthy Mathawiinaga liing gudbiyi.

Qothobky 89 aad-Guddiyaalky

1. Golo Shacbigy waa inii dhisy guddiyi ky baaraandegaw sharciyatha, kormeeraaw hooloo xukuumatha oo amnag walba fiira angky nagathaw, hubiyaaw miisaaniyiddy ii hisaabaadky xukuumatha ii hey'atho kalabà, haanaas oo Hantadhooraga Guud hisaabaadsho baaris-xisaabeed haky suubiyi.
2. Guddiyaa li dhisaw waa inii ki jerang Guddiyaalka Waahya Roogty eh oo ang qiibsang faaqithowkà hooloo Xukuumatha qiibooshee shal geddisang ang hilsaaranyiing, waana inii liky sargooyaa isla sithy liing qiibiye hilalka wasiirithy. Tù kastoo ka mid eh waahoo guddiyaalkaas waa inii liing hilsaaraa faaqidkà qiib too ku mid eh ama ku bathang hilalky xukuumatha
3. Golaga Walkiilthy Dowlotho-goboleed waa inii dhisa guddiyi holooshey futhuthaayaw.

4. Lamaathy Gola oo Baarlamaanka weybaa dhisithy koraany guddiyi iska dhafang.
5. Baarlamaangka weybaa ansihy kore sharci ang ogolaathaw guddoomiyi yaalky guddiyaa inii shaqathiyo gunny macquul eh liky siyaa.

Qothobky 90 aad Kiqiibgalky Wasiirithy e Fidhiyithy Baarlamaanka

1. Wasiirithy haku qiiibgalà koraang fidhiyaa Baarlamaanka, waany ku hathala koraang, iyoogo ed-dhiibasha angky lahaayné. Heer-hoosaadky Golaga Shacabkaa laky heeriye kolfidhiyaalky caathiga oho Wasiirithy ahaang kuku jiwaabayaang su'aaloo abtugaal ahaang ama tiraab ahaang ang ku kooyi hubnooga Golaga. Wasiirithy waa inii muujhiyaang iskaalad ii isla-shaqeeyow niyisamà hangku qiiibgalaang kolfidhiyaalkaas.
2. Wasiirithy weyba ing dhagaaya koree lamaathy Gola ama Guddy Roogty oho ka mid eh Golaga Shacabkà sithy ky husug Qothobky 91-aad.

Qothobky 91aad-Awoothy Kiqasawawky Kiqiibgalky Fidhiyithy

Baarlamaanka ii gudiyaalshey wey leyiina awood ly mid eh sithy owootho maxkamatho sharcigy eh oo qasab hortiyoo ky sheenà koraang markaataà ii dukumintiyaal si angky qiiibgalaang maragfur liinky baahangyi ky gundeeriddà arrin kastà oo Baarlamaanka baaristyeey ky jerà.

Qothobky 92 aad-Xurriyaathy Hathalky i Hasaanaddy Muthuniyaalky Baarlamaanka

Hubnoo Baarlamaanka malky dacwooy koro, maana liky maxkamatheey koro hathal kastoo iyoo ka jeethiyeeng Baarlamaanka dhathiis. Hubung ku mid eh Baarlamaanka oo ku sugung heendaabky Golaga Baarlamaanka, malky fuliy koro hathag ama baaris. Hubing Baarlamaanka ku mid eh mal hiry koro, malky eetheyi koro fal dembiyeed hoo Heer-ilaaliyeegy Guud qof ahaang ang oggolaany.

Fiirà Gaar eh: Hoo Nithaamka Baarlamaanka là qaathatha weybaa haboonà inii qothobky ha dareera liky darà.

Qothobky 93 aad-Hoggaamiyagy Mucaaradky.

1. Mathawiinaga waa inii Hogaamiyaagy Mucaaradky ang maga'aabaa qofkii hubnoo Golaga Shacabkà oo angky tirsinaayny xizbigy xukuumathà, isbaheysiny ing kili jirny.

2. Hafiisky Hogaamiyeegy Mu'aaradky waa inii li siiyi dhagaalà ki filing, oo ky jeraang hool-wetheenethy, si Mucaaradky angky suurtagallà inii hililshey ang guthuthy.

Fiirà Gaar eh: Guddigà weybaa guddoonsethey inii diyaariy Qothobee ki suurta-galaayaang dhismagy Nithaamky Baarlamaanigy eh ii Nithaamky Mathatooyithy eh, nithaam kastanà weybaa ky daba-hariirsanaa hay'athoo fulinty oo ku kastabà weeldhathà koro. Fulinta Nithaamkà Baarlamaanigaa hang horeey, reednà Fulinta Nithaamky Mathatooyathaa ki higy. Go'aanka angky dombooyona weybaa laky saleeyedoonee hadbà kii talooyingky ii fiirooyingky dadwiinaga haka tebiy Qalanghoraadka Dastuurka Latallatka Dadwiinaga.

UTUBKY 9 AAD LAANGTY FULINGTY FETHERELAARKY

Mereshatha 1aad: Nithaamky Baarlamaanigy

Qothobky 94 aad-Hawla Mathawiinaga

1. Mathawiinaga Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya weybaa ky dhiganyaa astaangty qarangky, kaas oo xukuumathanà xigmathiis ii waayi-aragnimithiis kà dar-deyithaas. Hililky hafiisky Mathawiinaga weyba ku mid ahaa inii fal ii tiraab ahaanbà ky hormariy mabaadi'thy aasaasigy ehe Dastuurka. Owootho Mathawiinaga weybaa ang badanyiinà owootho-maamuuseed ama usugoo fuliyaaw arrimà haky codsithy Ra'iisul-Wasaaragà, Golaga Wasiirithy ama Mas'uuliyiing kalà ama hay'athà kalà.
2. Si midnimaathy qarangky liing hoojhiy, lamaathy Gola Baarlamaanka waa inii ky dethaalang oo xaqiijhaang ing qobothowkà xilky hafiisky Mathawiinagy nagathaa koo meerty oho qiiboo bulshithy dhong qobothy koraang.

Qothobky 95 aad-Shuruutho Mathawiina lakà nogothà koro

Weybaa hilky Mathawiinaga liing doorothy koree muwaadhing kasty oo soomaali eh oo de'thiis afartang-jir ki wiinta, oo umuddà dhatiyeena ky leh sumcathà ii aruursanaangtà sara, kartina ang leh hoggaamingta hushamathà qaranka.

Qothobky 96 aad-Doorishithy Mathawiinaga ii Mathawiina Kihigeeng

1. Mathawiinaga inii doorathaangwu lamaathy Gola Baarlamaanka oo isli fidhiy. Lamatha Gola waa inii suubsithaang heer-hoosaad liky fuliyaw angjeeduthung iyeetho li isti'maalaw habra'a liky ku husung Jadwalky 3aad. [Doorishithy Mathawiinaga Nithaamky baarlamaanigy eh].
2. Mathawiinai ki-higeengky isli hanaangkaasa liky doorithee.

Qothobky 97aad- Hil-ka-Laaloowky ama Hil-ka-qaadowka Mathawiinaga

1. Ka-eetheyowka Mathawiinaga ka-xadguthub ulus ky saabsang nithaamky dastuurigy ama dembiyaalky khiyaana qarang weybaa ka etheeye koree Golaga Shacabka.
2. Hingdisaaga eetheenty weybaa ha oogo koree angky yaraang seddy dhigood hal dhig oo ka mid eh hubnoo Golaga Shacabka, hoo hindisigy maxkamadeynty taageeraang seddy dhigood lamma dhigood ka mid eh hubnoo Golaga, maddaas Mathawiinga hilkà hafiisky walkà laalee, weybaana hilkà weraay Mathawiina Ki-higeenka.
3. Maxkamathayoka dacwathoo lidky ki eh Mathawiinga weyba liky Maxkamatha Dastuuruga eh.

Qothobky 98aad-Muddathy Hilky Mathawiinaga

Mathawiinaga Jumhuuriyadda weyba hilkà haaye koree hal mathal oo muddy li (6) siny ley eh.

Qothobky 99aad-Owootho Mathawiinaga

Owootho Mathawiinaga wey buwaa:

1. Taliyaga guud iithimithy salabky sithy, oo eh hafiis maamuuseed oo owood angky lahayn;
2. Inii oggolaathy sharciyithy Baarlamaanka ha ansihyi ama reed angky naga Baarlamaanka ama ing diry Maxkamatha Dastuurigy sithy ky husung Qothobky 87(9);
3. Inii maga'aaby dang-jiriyaalky ii ergooyingky diplomaasigy eh, usoo fuliyaw dhalabka Golaga Wasiiridy;
4. Inii ky-dhawaaqa xaalathy degaalka usu oo fuliyaw dhalabka Golaga Wasiiritha, oo haysatha oggolashithi Baarlamaanka;

5. Inii ky-dhawaaqà xaalathy deg-degy eh sithy ku husung 163;
6. Maamuus-sharafeed ang biyowkà billitho-sharafeed ii shahaathooyinkà là muteysithi [si sharci waafaqsang];
7. Inii afis ing fithii ama iqaab ku dhimy dembiiliyaal usu oo ky talà-qaathathy guddy mathabinaang
8. Inii maga'aaby ii inii hil kuqaathy saraakiili sarsareeyaange Dawladda, maddii Golaga Wasiiritha ha oggolaadaang ku reed.

Qothobky 100 aad-Istqaaddy Mathawiinaga

Mathawiinaga weyba istiqaalathiis ang dhiilbee Golaga Shacabkà usu oo ang sii mariyaw Afhayeenky Golaga Shacabkà.

Qothobky 101 aad-Ki-simagy Mathawiinaga

Hoo Mathawiinaga dalky ku moqonjhy ama aafimaad-dorro dartiye iniing owoodny inii hilshey guthuthy ama sabab kastà oo kalà, ki-higeengky Mathawiinagaa hilshey sii qobotho ilaa Mathawiinaga hilky hafiis shey hakuku nagathow.

Qothobky 102 aad-Binnaawaashatha Hafiisky Mathawiinaga

Hoo hafiisky Mathawiinaga binnaawaatha, weyba hilky hafiisky Mathawiinaga sii haayee Ki-higeenka Mathawiinaga ilaa Mathawiina usub lahaky dooratha muddo 60 gee guthaantiye, kang oo sii dhamaytiraw mudditha ku hersang hilky Mathawiinigi horà.

Qothobky 103 aad-Dhaariyowky Mathawiinaga

Maddii hilky la waregaw Mathawiinaga Jamhuuriydda ii intii hilalalky hafiisky ang qobonà weyba Golaga Shacabkà hortii ki mareey dhaarty sharcigy ky husung; weybaana dhaarta maamuleey Guddoomiyaga Maxkamatha Dastuurigy.

Ra'iisul-wasaaraga ii Golaga Wasiirithy

Qothobky 104 aad - Hariirky ku Dhahooyi Ra'iisul-wasaaraga ii Mathawiinaga

Ra'iisul-wasaaraga waa inii si roogty eh Mathawiinaga angky wargeliyaa hoolo Xukuumatha.

جمهورية الصومال

Qothobky 105 aad-maga'aawowky Ra'iisul-wasaaraga.

Mathawiinaga weybaa Ra'iisul-wasaara ang maga'aawey qofky ang mathagy eh xizbigy angky aqlabiyad bathang Golaga Shacabka. Hoo ang jirna xizbi aqlabiyad buuty leh, Mathawiinaga weybaa Ra'iisul-wasaara ang maga'aabee qofky haaysithy taageridy axzaabta watha-jerky hubneesho nagathaw aqlabiythy Golaga Shacabka.

Qothobky 106aad-Kalsooni-siinty Xukuumadda ii Barnaamijshe

1. Ra'iisul-wasaaraga maddii li maga'aaby, soddong malmood guthaangtiye waa inii Golaga Shacabka warsathaa inii ed-kalsoony siyaang hubno golaga Wasiirithiis ii barnaamijky Xukuumathiis.
2. Golaga Shacabka hoo edk-kalsoony ky ansihy waay Golaga wasiiritha ii barnaamijky xukuumatha laha jeethiyi, Ra'iisul-wasaaraga weybaa leyaa lamma fursathood oo ang shal dhohoyty muddo soddong gee angky bathanayny oo haky jeethii kore hubny wasiira oo dhammaantiyo ama qiib ku mid eh ku geddising hanii horo.
3. Hoo fursathy seddehaad Ra'iisul-wasaaraga ky guul-darreysithy inii helà Edky kalsoonithy, Golaga Shacabkanà [hal usbuuc] gudaantiye haky jeethii waayi Ra'iisul-wasaar kalà, Mathawiinagawaa inii shal-diraa Golaga Shacabka, oo doorasha guud usub liing qobothaa Golaga Shacabka.

Qothobky 107 aad-Hil-ku-qaathawky Ra'iisul-wasaaraga

Mathawiinaga waa inii si deg-deg eh Ra'iisul-wasaaraga hilky angky qaathaa maddii edka kalsoona-kala-nogoshatha [si waafaqsan qothoky 110] liky meel mariy ku reed, si kalanà hilky ma angky qaatha koro.

Qothobky 108 aad-Maga'aabowky Wasiirithy

1. Mathawiinaga, oo fuliyaw odsigy Ra'iisul-wasaaraga haky magadhowi wasiirathy, weybaa maga'aawe Gola wasiira oo tirithiyo angky bathanaathy korny 23 hubnood oo Ra'iisul-wasaaragana ki mid eh. Hubnoo Golaga Wasiirity weyba lahaku merethee hubna ing ku tirsinaayny lammaatha Gola Baarlamaanka, ama hoo hubung ky éying na waa inii hubungnimatha golayaalkà Baarlamaangka iska casilaang.
2. Ra'iisul-wasaaraga maddi usu maga'aabaw Golaga Wasiirithy waa inii tihgiliyaa qiiboo bulshithy ku koobangty ii karty-farsamatheedda qofka hilky liing dhiibaw.

Qothobky 109 aad- Hil-ku-qaathawky Wasiirithy

Ra'iisul-wasaaraga hilky ky qaathy koro wasiirathy, si kalya ama owood kala oo hilky ku qaathy kortoonà ma jerty.

Qothobky 110 aad-Edky kalsoonithy kuli nagashithy

1. Edky kalsooni kulu-nogoshathy Rai'iisul-wasaaraga weyba hajeethiy kore angky yaraang 20 Hubnood oo ku tirsing Golaga Shacabka.
2. Edky kalsooni kulu-nogoshathy mal hajeethii koro hal siny guthaantiye laka bilaawa marki Rai'iisul-wasaaraga liing dhaariy hilshey ama iyeetho hal sinithy ki dhiminta taariikdy qoboshoothy dooroshooingky guud guthaantiye.
3. Hoo edki kalsooni kulu-nagashithy meelmar nagatha waa inii li maga'aabaa hubing ki tirsing Golaga Shacabka oo liki bedelow Rai'iisul-wasaaraga edky kalsoonitha la kuly nagashithy.
4. Edky kalsooni kulu-nogoshithy meel mar ma nagathaw hoo hubno Golaga Shacabka goobroogga ang oho ka ed-dhibathaw ka yararyiing 70%. Edki kalsooni kulu-nogoshathy weyba ki ansaheey hadii taageeraang in ky bathang nun-ku-nuska hubno Golaga Shacabka.
5. Haddii edky kalsooni kulu nagashithy ky ansaha sitha waafaqsang faqradda 3-aad, Rai'iisul-wasaaraga ii dhamaang wasiirithi waa inii isla maddiba is asilaan, Mathawiinagana waa inii hilka ang dhaariyaa Raai'iisul-wasaaraga usub oo lahang magacaabi.
6. Ra'iisul-waasaarg hoo is asili waay, Mathawiinaga waa inii usu hilka ka qaathaa Rai'iisul-wasaaraga.

جمهورية الصومال

Qothobky 111 aad-Xukuumatha Hil-Deersingty

Inty ang dhohooyti taariikdi doorashithy guud ii marki Ra'iisul-wasaaraga usub laky dhaariyaw, Ra'iisul-wasaaragii horo ii Goloshey wasiirathy yaa si deersing eh ang sii haayayaan hilki, weybaana owoodiyo ku koobantaa inii fuliyaan hool-maalmeed xukuumtha.

Qothobky 112aad-Dhaarty

Ra'iisul-wasaaraga ii Goloshey wasiirithy marki helaang edki kalsoonithi sithy ku husung qothobky 106, intii iyoo hilsho ang bilaawne, wali liki dhaariyeey kolfidhi gaar eh e Golaaga Shacabka, weybaana dhaariyeey Gudoomiyaaga Maxkamadda Dastuurigi eh.

UTUBKY 9AAD-LAANGTI FULINGTY EE FEDERAALKA

Hulishidy 2aad: Nithaamky Mathatooyithy

Qothobky 94 aad-Mathawiinaga Jamhuuriyadda

Mathawiinaga Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya weybuwaa Mathigy Dawladda, midnimaatha Qaranaka ii Mathigy Xukuumadda.

Qothobky 95 aad-Shuruutho Mathawiinaga

Wali liing doorithy koree hilky Mathawiinaga muwaading kasty oo soomaaliyeed o de'this afartang-jir ka wiinta, leh tacliin ii waayaragnimia ka habboong oo umuddu dhatiyeena ky leh sumcat ii aruursanaang sara, kartina ang leh hoggaamingta hushamathà qaranka.

Qothobky 96 aad-Doorisithy Mathawiinagi ii Mathawiiny Ki-higeengki

1. Mathawiinagi ii Mathawiina Ki-higeengki wey si toos eh hang doorethey dadwiinagy.
2. Qofkii hely tirithy angka bathang ethedhee ansaha yaa nagathe Mathawiinaga, weybaase shardi ehe in qofkaas helaa ing ku bathan 50% ethedki li tiriyo oo ansah eh, ama helaa ing ku bathan 40% ethedky doortayaalka iyooney ang ki yaraang 25% etheedky seddy meelood lamma meel Dowlatho-goboleed kasti. Hoo qofnà shuruthogaas tootiyo buuyi waay, weybaa inii shal-rooyaang li tartangsiyeey lamaathy musharrax oo heleeng tirithy ethedkà ang ki bathang.

3. Doorishithy Mathawiinaga ii Mathawiina ki-higeengki ii tang Golaga Shacabkà waa inii li qobotthaa isly yoonko, angka hayna sitha ku husung qothobky 103 (4) oo qobothowky doorasha gaar eh maddaas linku maaramaana [hooba dhiithi inii Afhayeenga qobotha hilki Mathawiinaga oo binnaawaathi].

Qothobky 97aad-Ha maga'awowky Musharraxa

1. Musharrax Mathawiini ama Mathawiina Ki-higeengbà weyba ha jeethii koree axzaabtà siyaasga ama weyba nogothe koree Musharrah mathabinnaaw.
2. Qofkà hang surumaw Musharraxnimy mathabinnaw waa inii usu hang qobone hafiis xizbi siyaasi shantii sinny laha mooti.
3. Qofkà nagathaw Musharrax mathabinnaaw waa inii usu haaysithi taageerayaal deraw ing yaraang 500 ed-dhiibayaal diiwaangallang, oo ku shal sugun ang yaraang nus-ku-nus Dowlatho-goboleed. Hoo Musharraxa éyi qof xizbi siyaasi ha jeethiyi, maga'aawowshey waa inii taageeraang inky yaraan hal laang o ku mid e laamo xizbigy ki yaalaang Dowlatho-goboleed kasty.

Qothobky 98 aad-Hil-kiqaadawky Mathawiinaga

1. Mathawiinaga Jumhuuriyadda weyl ey hilky liinku qaathy koree hoo usu ku xad-guthubà nithaamka Dastuuriga eh, hoo jeysatha takrifal culus owooddy hafiisky, ama usu gala dambiculus oo ciqaab laka muteysathaw.
2. Maxkamatheeynta Mathawiinaga weybaa ha jeethii koree ingki yaraang seddy seddy meelood hal meel hubnoo Golaaga Shacabkà. Maddii laky doothà ku reed, hoo hindisaaga sharci ogolaathang seddy meelood lamma meel hubnoo Golaga shacabkà, waa inii hindisaaga sharci ling gudbiyaa Golaga Wakiilithi Dowlatho-goboleed.
3. Hoo hindisaaga sharci ansihyaang seddy meelood lamma meel hubnoo Golaga Walkiilady Dowlatho-goboleed iyoogooaing etheeyaw qof-qof oo iniing ed-dhibathaane kooh goboleed maxkamatheyntà Mathawiinagà waa inii li so'odsiyaa.
4. Ed-dhiibashatha lamaatha Golaba wey liing qaatheye si qarsoothy eh.

5. Dacwatha lidky ke eh Mathawiinaga weyba laka galeeye Maxmadda Dastuuriga.
6. Ho Maxkamadda Dastuuriga ke eddayta inii usu gali xadguthub dastuuri ama dembi kalà, Mathwiinaga waa inii is asilaa.
7. Hoo Hindisaga Sharci lahaka jeethiyi maxkamatheyntà Mathawiinaga lakà ansixiye aqlibiyad liinkà baahanaye lamaathà Gola, Mathawiinaga xilkaa toos liingka laalee ilaa intii dacwa-qaadka Maxkamatha Dastuuriga haka gebagebaaayaasà. Mathawiini ki-higeenkaa sii qobothree hilky Mathwiinaga ilaa intii da'wathiis haku dhamaathaasy.
8. Waa inii laha saaraa sharci lammaatha golaba ka ansahiyaayaang seddy meelood lamma meel hubnaasho, oo liki eddaayaw habraa' caadil oho Mathawiinaga hilky hafiiska liingka qaathaw hoo ka dhiithi naafa jireen ama tu masqaneed dartiyoo usu la guthuthy waay hilalky hafiiska.
9. Mathawiini ki-higengka weybaa usunà liky maxkamatheey koree isla eethoo ii habra'a Mathawiinaga liky maxkamatheeye koro.

Qothobky 99 aad-Mathawiina kihigeenky

Musharrixiinta jagathy Mathawiinaga yaa ha xuluthaayaang qofkii ki-higeeng ang nagatha fathi oo dorashatha la galaw, qof kaas oo nagathaw Madathawiina ki-higeeng hoo doorashootha ka guuleysathan.

Qothobky 100 aad- Muddatha Hafiisky Mathawiinaga ii Mathawiiny ki-higeengky

Mathawiinaga ii Mathawiini ki-higeengky weybaa haayayana hafiisky ingki bathanaan lamma mathal oo mathaliiba shang sini eh.

JUMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Qothobky 101 Owoodda Mathawiinaga.

Owootho Mathawiinaga weybuwaa:

1. Maga'awowki ii shal dirowky Wasiirathà Dowlidday Federaalka
2. Taliyi guud ee iithimithy salabky sithy.

3. Inii oggolaathy ama reed angky naga sharci Baarlamaanka ansihyi ama ang dirà Maxkamatha Dasturigy sithy ky husung Qothobky 88
4. Inii maga'aaby dang-jiriyaalky ii ergooyingky diplomaasigy eh;
5. Inii ki-dhawaaqi xaalathy dagaal ama xaalathy nabadeed, maddii ha ogolaathaang lamatha Goly Baarlamaanka.
6. Inii ki-dhawaaqi haalathy deg-degy eh sithy ki husung qothobky 169(3).
7. Inii usu biiy billid-sharafeed ii aqoonsiyithy kalà oo mudnaangty gaarka leh.
8. Inii afis ing fithii ama iqaab ku dhimy dembiiliyaal usu oo ky talà-qaathathy guddy mathabinaang
9. Inii qobothy xilalka kalà oo liingki hilsaari destuurkung ami sharciyaa kalà oo waafaqsing destuurkung ii qiyamshey.

Qothobky 102aad-Hilalkà Mathawiina Ki-higeengky

1. Mathawiina ki-higeengky wey kaalmeeye Mathawiinaga, weybaana nagathey sii-haayaga jagathà Mathawiinaga maddii Mathawiinaga dibiddi ku moqonyi ama sababa kalà dartiyo angla guthuthy korno hilshey. Hoo Mathawiinaga usu oo hilshey haaya geeriyooty, istiqala dhiibà, hilky hafiisky lakà laala ama hilky lakà qaathà hilky, Mathawiina ki-higeengky wey nagatha Mathawiina si waafaqsan qothoky 103.
2. Qofka sii-haayaga hilky Mathawiinaga eh owood ma ang leh inii maga'aawa ama hilka ky qaatha wasiiratha, ama maga'aawa garsoorayaal ama reed angky naga sharci Baarlamaanka ha ansihyi, angka hayne hoo Mathawiinaga si abtugaal eh ingky wakiilithy inii sidaas ang fuliy maa, ama ang hayne maddii Mathawiinaga oo muddy seddy bilood ku bathang weli ang owoothy korno dib-ang-qoboshootha hil-guthuthowka hafiiska.

Qothobky 103aad-Binaawaatka Hafiisky Mathawiinaga

1. Hoo Mathawiinaga geeriyooty, istiqala dhiiba, ami hilky laka qaatha, Mathawiina ki-higeengkaa hilky la wareegee. Hoo ang jerni Mathawiina ki-

Qabyaqoraalka Dastuurka Liingka Talagali Latallatka Dadwiinaga

higeen ama Mathawiina ki-higeenky ing awoodny inii hilky qobothna, Afhayeenka Golaga Shacabkaa la wareegee hilki Mathawiinaga.

2. Mathawiina ki-higeenky weyba hilki sii haayeey inta ku hersing mudithy hilky Mathawiinaga.
3. Hoo Mathawiina ki-higeenkii hore waktiga Mathawiinanimatha liing dhariyi ilaa muddithii mathalla Mathawiinaga angku dhamaatha lahayti ku bathantà lamma sini ii nus, muddithy Mathwiina ki-higeenka hilky Mathawiinanima ang haayi weyba ling hisaabiyeey ini éti hal mathal hileed oo dhang. Hoo kalà waqtigaas weyba liing tihgiliyeey inii ing haayni “mathal-hileed” sitha ang abbaarang angla-jeedooyingky qothobky 100 [Muddi hileedki Mathawiinaga].
4. Hoo Mathawiinaga geeriyoothy, istiqaal dhiiby, ami hilky luku qaathy, Afhayeenka Baarlamaankana hilky kulu wareegee si waafaqsan faqaradda (1) ii qothobka 105, waa inii 90 bere gudaashoo doorishi liing qobothaa muddatha ky dhimang mathal-hileeddy Mathawiinaga.
5. Hoo muddathy matha-hileeddy Mathawiinaga ku hersing ingku bathanaayni 18 bilood, ma jiraasa doorasha liing qobothaw, weybaana hilky Mathawiinanimatha sii haayey Afhayeenky Golaga Shacabkà oo dhamaaytiraw muduthy mathal-hiliyeedda mathatooyatha ka hersang.

Qothobky 104aad-Habky Istiqaaladda Mathawiinaga

Mathawiinagi weyba istiqaaladdiis ang gudbiyeey Golaga Shacabkà usoo ang sii mariyaw Afhayeenky Golaga Shacabkà.

Qothobky 105 aad-Binaawaangti Hafiiski Matha-wiinagy

Mathawiina ki-higeenky hoo geeriyoothy ama istiqaal jeey ama hilky luku qaatha Afhayeenka Golaga Shacabkaa hilshey là wareege.

Qothobky 106-Dhaarti Mathiwiinagy

Inti usu hooli ing bilaawni Mathawiinaga Jamhuuriyiddi weyba mareey dhaarty ki husung sharcigi weyna liki hor dhaariyeey haflad ku dhiyaasi fagaara dadwiinaga roogang weybaana dhaariyeey Gudoomiyaaga Maxkamatha Destuurigi eh.

Qothobky 107aad-Golaga Wasiirithy

1. Mathawiinaga weyba maga'aawey Gola Wasiirà ingku bathanaayni 23 hubnood oo ki jeraang Mathawiinaga ii Mathawiina ki-higeengky, oo lahakà huluthaw dad angky mid hayne hubno lamaathy Gola Baarlamaanka. Qofkii Wasiir liing maga'aaba oo hubung ku eh lamaathi Golo tootiyo ama haayi hil xafiis Dowletheed ama ka shaqaaleysanaayi qiipta gaar-ahaanta eh, waa inii iska casilaa kursigaas ama istigaala ka jeeyaa hilkii xafiisky ama shaqathii ka shaqaaleysanya 90 maalmood guthaantiye ku reed madi hafiiska liing dhaariyi.
2. Mathawiinaga maddii usu dhisaw Golaga Wasiirithy waa ini tihgiliyaa qiibo bulshithi Soomaaliyeed ku koobangtà.
3. Golaga Wasiirithy usub weybaa wathar haang ang ansihiyey Golaga Shacabkà, hubnood reed lahaka maga'aawana qof qof ahaang.
4. Mathawiinaga shaleethiss ley owood ang le oo hilky ku qaatha koro wasiirathy.

Qothobky 108aad-dhaarty Wasiirathy

Golaga wasiirithy maddii helà edkà kalsoonithi Golaga Shacabkà, hubung kastoo Golaga Wasiirathy ka mid eh weybaa Golaga Shacabkà hortiiis ka mareey dhaarta ku husung sharciga weybaana dhaariyey Gudoomiyaaga Maxkamatha Dastuuriga.

جمهورية الصومال

